**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada

# Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada

September 2020

# Tusmada Siyaasadda


MAHADNAQ ........ 1
LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY ........ 2
MACNAHA EREYADA ........ 3
SOO KOOBIDDA SIYAASADDA ........ 5
CUTUBKA 1aad GUUD-MAR, YOOLKA, MABAADI’DA & UJEEDOOYINKA SIYAASADDA ........ 7
1.1. Guud-Marka Siyaasadda ........ 7
1.2. Baahida Loo Qabo Siyaasadda Isbaddelka Cimilada ........ 8
1.3. Hanaanka loo Maray Diyaarinta Siyaasadda ........ 9
1.4. Hiigsiga Siyaasadda (Vision) ........ 10
1.5. Hawlgalka Siyaasadda (Mission) ........ 10
1.6. Mabaadi'da Siyaasadda ........ 10
1.7. Ujeeddooyinka Siyaasadda ........ 11
1.8. Hirgalin/Dabaqid ........ 11
CUTUBKA 2aad WAAQACA SIYAASADDA ........ 12
2.1. Waaqaca Isbaddelka Cimilada ee Heer Caalami iyo mid Gobol ........ 12
2.2. Waaqaca Dalka ........ 12
CUTUBKA 3aad FALANQAYNTA XAALADDA IYO SAAMEYNTA ISBADDELKA CIMILADA EE SOOMALIYA ........ 14
3.1. Caddeynta Isbaddelka Cimilada iyo Saadaasha Soomaliya ........ 14
3.1.1. Isbaddelka Heerkulka ........ 14
3.1.2. Isbaddelka Qaabki uu u di’i jiray Roobku ........ 14
3.1.3. Xaaladaha Cimilo ee Ba’an ........ 15
3.1.4. Heerkulka Oogada iyo kor u kaca heerka badda ........ 15
3.2. Saameynta Isbaddelka Cimilada ee Soomaaliya ........ 16
3.2.1. Saameynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ........ 16
3.2.2. Saameynta Wax Soo Saarka Beeraha, Xoolaha & Kalluunka ........ 17
3.2.3. Saameynta Deegaanka, Biyaha iyo Keymaha ........ 17
3.2.4. Xaalufinta Dhirta iyo Nabaad Guurka ........ 18
3.2.5. Saameynta Caafimaadka ........ 18
3.2.6. Saameynta Badda iyo Xeebaha ........ 19
3.2.7. Saameynta Kaabayaasha ........ 19
3.2.8. Saameynta Horumarka Dhaqaale ........ 20
3.2.9. Saameynta Isu-socodka/Haajiridda (Migration) ........ 20

CUTUBKA 4aad MAWDUUCYADA MUHIIMKA AH (CROSS-CUTTING THEMES) ... 21
4.1. Kobcinta Awoodda iyo Aqoonta ... 21
4.2. Cilmi baaris iyo Teknoolajiyadda ... 21
4.3. Iskaashiga Caalamka iyo Gobolka ... 22
4.4. Maareynta Aqoonta iyo Helitaanka Macluumaadka ... 23
4.5. Waxbarashada iyo Wacyi gelinta Dadweynaha ... 24
4.6. Ka qayb qaadashada Isbaddelka Cimilada ... 24
CUTUBKA 5aad WAAXYAHA AHMIYADDA GAARKA AH LEH ... 26
5.1. U adkaysiga iyo La-Qabsiga Isbaddelka Cimilida ... 26
5.1.1. Beeraha ... 26
5.1.2. Xoolaha ... 27
5.1.3. Kheyraadka Biyaha ... 28
5.1.4. Kheyraadka Badda ... 29
5.1.5. Keymaha, Duurjoogta iyo Noolaha kala duwan ... 29
5.1.6. Kaabayaasha Dhaqaale ... 30
5.1.7. Magaalooyinka ... 31
5.2. U diyaargarowga Masiibooyinka & Wax ka qabashadooda ... 32
5.3. Hoos u dhigid/Yareyn (Mitigation) ... 33
5.3.1. Tamarta ... 33
5.3.2. Beeraha ... 34
5.3.3. Isticmaalka Dhulka iyo Keymaha ... 35
5.3.4. Warshadaha ... 36
5.3.5. Qashinka ... 36
5.4. Arimaha Bulshada iyo Isbaddelka Cimilada ... 37
5.4.1. Caafimaadka ... 37
5.4.2. Xuquuqul Insaanka ... 38
5.4.3. Jinsiga iyo Isbaddelka Cimilada ... 39
5.4.4. Shaqada iyo Isbaddelka Cimilada ... 40
5.4.5. Haajiridda iyo Isbaddelka Cimilada ... 41
CUTUBKA 6aad MAAMULKA SIYAASADDA ISBADDELKA CIMILADA ... 43
6.1. Qaab-dhismeedka Hay'addaha ... 43
6.1.1. Hay'addaha Dowladda & Guddiyadda ... 43
6.1.2. Ururada Rayidka (Ururada aan Dowliga ahayn) ... 47
6.1.3. Shirkadaha Gaarka ah ... 48
6.2. Qaabdhismeedka Sharciga ... 48

6.2.1. Xidhiidhka Siyaasadda Isbaddelka Cimilada iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020 to 2024 ..... 48
6.2.2. Siyaasaddaha iyo Sharciyada kala duwan ee taabanaya Deegaanka & Isbaddelka Cimilada49
6.2.3. Heshiisyada Caalamiga ah ..... 49
CUTUBAKA 7aad DHAQAALAHA/MAALIYADDA ISBADDELKA CIMILADA ..... 51
CUTUBKA 8aad DABAGALKA IYO QIIMEYNTA SIYAASADDA ..... 53

## MAHADNAQ

Siyaasadda Isbaddelka cimilada ee Soomaaliya waxaa la diyaariyay iyada oo ay si firfircoon uga qayb-qaadanayeen daneeyayaal kala duwan kuwaas oo gacan buuxda ka gaystay dhamaystirka siyaasaddan. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ee JFS ayaa hogaaminaysay dejinta  siyaasadda isbaddelka cimilada iyadoo taageero ka helaysay Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay iyo barnaamijka taageeridda deegaanka ee loo yaqaan (GEF).

Wadatashiyada diyaarinta siyaasaddan waxaa qayb ka ahaa mas'uuliyiinta dowladda Federaalka, xubno ka mid ah maamul goboleedyada, ururada  bulshada rayidka ah, haya'adaha caalamiga ah iyo guddiga ilaalinta deegaanka ee Golaha Shacabka Soomaaliya. Waxaan halkan uga mahadcelinayaa dadaalkoodii iyo gacanta ay ka gaysteen sidii ay siyaasaddani u dhamaystirmi lahayd.

Waxaa kale oo aan u mahad celinayaa shaqaalaha Wasaaradda Deegaanka & Isbaddelka Cimilada oo si hagar la,aan ah uga qayb qaatay dhanka isku xirka mas'uuliyiinta dowladda Federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada iyo fududeynta sidii loo qaban lahaa kulamo wada-tashi intii ay socotay diyaarinta siyaasadda isbaddelka cimilada ee Soomaaliya.

**Mahadsanidiin**

**Amb. Khadija Mohamed Almakhzoumi**

**Wasiirka Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, JFS**

# LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY

| | |
|---|---|
| $CH_4$ | Methane |
| $CO_2$ | Kaarboon Laba Oksaydh (Carbon Dioxide) |
| DFS | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| GHG | Gaasaska Hawada Wasakheeya (Greenhouse Gases) |
| IFRC | Ururka Caalamiga ah ee Laanqeyrta iyo Bisha Cas (International Federation of Red Cross and Red Crescent Societies) |
| ILO | Ururka Shaqada ee Adduunka (International Labor Organization) |
| INC | Warbixinta Hordhaca ah ee isbaddelka cimilada (Initial National Communication) |
| INDCs | Ka go'naanta Qaran ee Wax ka qabashada isbaddelka cimilada (Intended Nationally Determined Contributions) |
| IPCC | Guddiga Qaramada Midoobey ee Isbaddelka Cimilada (Intergovernmental Panel on Climate Change) |
| MoLFR | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha |
| $N_2O$ | Nitrous Oxide |
| NAPA | Barnaamijka Qaran ee La-qabsiga Isbaddelka Cimilada (National Adaptation Programme of Action) |
| NDP | Qorshaha Horumarinta Qaranka (National Development Plan) |
| $NO_2$ | Nitrogen Dioxide |
| R&D | Cilmi Baaris & Horumarin (Research and Development) |
| SDGs | Yoolalka Horumarka Waara (Sustainable Development Goals) |
| $SO_2$ | Sulphur Dioxide |
| UNDP | Hay'adda Horumarinta ee Qaramada Midoobey (United Nations Development Programme)) |
| UNEP | Hay'adda Qaramada Midoobey ee Deegaanka (United Nations Environment Programme) |
| UNIDO | Hay'adda Qaramada Midoobey ee Horumarinta Warshadaha (The United Nations Industrial Development Organization) |
| UNFCCC | Heshiiska Qaramada Midoobey ee Isbaddelka Cimilada (United Nations Framework Convention on Climate Change) |
| REDD+ | Dhimidda Kaarboonka ka dhasha xaalufinta dhirta (Reduce Emissions from Deforestation and Forest Degradation) |

## MACNAHA EREYADA

**La-qabsi ama La-qabsasho**: Waa habka loola jaan qaadayo isbaddelka cimilada ee dhacay, dhacaya ama la filayo in uu yimaado mustaqbalka iyo saameyntooda. Laqabsashadu waxay sahashaa in la yareeyo ama laga hortagto dhibaatooyinka iyo in laga faa'iideysto fursadaha soo bixi kara (UNFCCC, 2020).

**Ficilada Aadanaha (Anthropogenic):** Waa saameyn ka dhalata ficilada aadanaha taas oo qayb ka qaadata Isbaddelka cimilada. Ficiladaas waxaa ka mid ah isticmaalka shidaalka, xaalufinta dhirta, maareynta qashinka iyo warshadaha.

**Kaarboon ka Saarid (Carbon Sink)**: Waa hawl kasta ama farsamo (ha ahaato mid dabiici ah ama aan dabiici ahayn), taas oo hawada ka saareysa (is la markaana keydinaysa) kaarboonada ay ku jiraan maadooyinka kiimikada sida $CO_2$.

**Isbaddelka Cimilada:** Waa isbeddel cimilo oo si toos ah ama si dadban loogu aanaynayo in ay sababeen ficilada aadanaha kuwaas oo wax ka badelaya qaab-dhismeedka dabiiciga ah ama jawiga adduunka. Intaas waxaa dheer ama weheliya isbeddelada cimilada ee dabiiciga ah (natural climate variability).

**Cimilo (Climate):** Waa cabiraad isku-dhafan oo lagu cabiro celceliska heerka isbaddelka heerkulka, huurka, roobka, dabeysha, walxaha hawada ku jira iyo dhamaan isbeddelada kale ee cimilo ee ka dhaca gobol wakhti dheer (badanaa 30 sano).

**Khatarta Cimilada ba'an**: Waa dhacdo ama jawi cimilo oo ba'an taas oo dhibaato iyo dhaawac u geysata dadka, hantida, kaabayaasha dhaqaale, dhulka iyo guud ahaan deegaanka.

**Tabcashada Casriga ah (Climate Smart Agriculture):** Waa habka haga siddii loo qaadi lahaa tallaabooyinka loo baahan yahay in isbeddel lagu sameeyo nidaamka wax soo saarka beeraha iyadoo la tixgelinayo isbaddelka cimilada is la markaana si wax ku ool ah loo horumarinayo sugnaanta cuntada. Ujeedooyinka **Tabcashada Casriga ah** waa saddex: in si joogteysan/waara (sustainable) kor loogu qaado wax soo saarka beeraha iyo dakhliga ka soo baxa, kor u qaadida la-qabsashada iyo u adkeysiga isbaddelka cimilada, iyo yareynta ama hoos u dhigida kaarboonka hawada wasakheeya intii suurtagal ah (IPCC, n.d).

**U diyaargarowga Masiibooyinka:** Waa tallaabooyinka la qaado si loogu diyaargaroobo ama loo yareeyo waxyeelooyinka masiibooyinka. Waa saadaalinta iyo haddii ay suurtagal tahay, ka hortagga masiibooyinka, yareynta saameynta soo gaadhi karta noolaha iyo deegaanka, in si wax ku ool ah looga jawaabo waxna looga qabto saameynta/raad-reebkooda masiibooyinka. (Ururka Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas - IFRC).

**Nidaamka Digniinta Hore** (**Early Warning System**): Waa awooddaha loo baahan yahay in la sameeyo/kobciyo si loo ururiyo loona faafiyo (baahiyo) macluumaadka digniinta oo wax ku ool ah iyadoo la baahinayo wakhtiga ku haboon ama loo baahan yahay. Taasi waxa ay dadweynaha, bulshada iyo cid kasta u suurtogelinaysaa in ay helaan wakhti ama fursad ay ugu diyaar garoobaan si loo yareeyo waxyeelada ama khasaaraha masiibooyinka ka dhalan kara (IPCC, n.d).

**Kaarboonka Hawada Wasakheeya (GHGs):** Waa gaasaska wasakheeya hawada kuwaas oo sababa kululaansha adduunka iyo isbaddelka cimilada. Gaasaskaas kuwa ugu muhiimsan waxaa ka mid ah Kaarboon laba oxide ($CO_2$), methane ($CH_4$) iyo nitrous oxide ($N_20$). Gaasaska kale ayaa ah

hydrofluorocarbons (HFCs), perfluorocarbons (PFCs) iyo sulphur hexafluoride ($SF_6$). (UNFCCC, 2020).

**Yareyn ama Hoos u Dhigid (Mitigation):** Waa ficillada aadanaha ee ku aadan siddii loo yareeyn lahaa kaarboonka hawada wasakheeya. Tusaale: isticmaalka shidaal nadiif ah ama aalado aan shidaal badan isticmaalin, tamarta cadceedda/qoraxda ama dabeysha, dhir-beeris iyo balaarinta keymaha. (UNFCCC, 2020).

**Adkeysiga (Resilience):** Waa awoodda bulshadu ay u leedahay in ay u adkaysan karto dhibaatooyinka iyo isbeddellada soo wajaha iyo siddii ay u sii socon lahayd qaab-dhismeedka aasaasiga ah ee bulshada. Adkaysigu waa awoodda ay bulshadu u leedahay in ay noolaato, ka soo kabato iyo in ay xiitaa guul ka gaarto la tacaalidda xaaladaha Isbaddelka cimilada. Awoodahaas waxaa ka mid ah fahanka saameynta ka dhalan karta dhacdo iyo in la qaado tallaabooyin ku habboon ka hor, inta lagu guda jiro iyo ka dib dhacdada, sida fatahaadaha iyo abaaraha. Ujeeddadu waa sidii loo yareyn lahaa saameynta daran ee masiibada iyo in la kobciyo kartida wax looga qabanayo xaaladaha isbadelaya oo ay ku jiraan xaaladaha aan la saadaalin karin (IPCC, n.d).

**Nuglaanshaha (vulnerability)**: Waa heerka uu nidaam u nugul yahay ama u adkeysan karin saameynta isbaddelka cimilada iyo khatarha cimilada daran (IPCC, n.d).

## SOO KOOBIDDA SIYAASADDA

Isbaddelka Cimilada waxaa lagu tiriyaa mid ka mid ah dhibaatooyinka waa weyn ee qarnigan iyada oo saameyn ba'an ku leh dalalka soo koraya sida Soomaaliya. Khataraha lala xiriiriyo isbaddelka cimilada wuu wejiyo badan yahay waayo saameynteedu waxay ka gudbaan xuduuddaha iyada oo saameynaysa silsiladaha cuntada iyo isku tiirsanaanta noolaha. Haddaba, si Soomaaliya ay u gaadho hab-dhis dhaqan-dhaqaale oo waara, waxaa loo baahan yahay in kheyraadku noqdo mid dadka iyo xoolahaba ku filan loogana faa'daysto si joogteysan. Si kastaba ha ahaatee, helitaanka kheyraadka dalka waxaa khatar weyn ku haya isbaddelka cimilada taas oo si xun u saameysay cunto soo saarista, kheyraadka biyaha, caafimaadka (badqabka) dadka iyo nawaaxiga xeebaha. Sidaasi awgeed, waxaa la tixgeliyay shakiga laga qabo in Soomaaliya ay saameyso isbaddelka cimiladu iyo adkaanta in la gaadho Yoolasha Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay ay dejisay 2015-kii. Waxaa jira caddeymo muujineysa saameynta isbaddelka cimilada ee Soomaaliya, sida heerkulka kordhaya; isbaddelka roobka, oo ay ku jiraan dhacdooyinka ba'an ee aan la saadaalin karin (abaaraha, duufaanada iyo daadadka).

Marka la eego saadaasha isbaddelka cimilada, waxaa laga cabsi qabaa in uu dalku wajaho khatar weyn sababtoo ah dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu ku tiirsan yahay kheyraadka dabiiciga ah sida wax soo saarka beeraha, xoolaha, biyaha, kheyraadka badda iyo keymaha kuwaas oo u nugul isbaddelka cimilada. Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in la dejiyo siyaasad hagta la-qabsashada iyo yareynta u nuglaanta isbaddelka cimilada. Dowladda Soomaaliya waxa ay aqoonsan tahay in Isbaddelka cimiladu ay qayb ka noqoto siyaasaddaha iyo qorshayaasha hay'addaha dowliga ah si loo gaaro horumar waara.

Sidaas darteed, hiigsiga Siyaasadda Isbaddelka Cimiladu waa:

***Gaaritaanka barwaaqo iyo dhaqaale u adkeysan kara saameynta isbaddelka cimilada, iyada oo la qaadayo tallaabooyin wax ku ool ah oo ku aadan la-qabsiga isbaddelka cimilada iyo yareynta kaarboonka hawada wasakheeya.***

Siyaasadani waxa ay:

i. Kor u qaadaysaa saameynta fel-celin qodobaysan oo xal u ah dhibaatooyinka hadda jira iyo weliba fursadaha bannaan ee ku wajahan Isbaddelka cimilada.
ii. Dardargelinta qaab-dhismeedka hawl-gallada iyo go'aanada lagula tacaalayo isbaddelka cimilada.
iii. Kolka la dhaqangeliyo siyaasaddan, Soomaaliya waxa ay hiigsan doontaa xoojinta badqabka muwaadiniinteeda iyo ka miro dhalinta horumarka waara.

**Ujeeddooyinka Gundhigga u ah Siyaasaddan:**

i. La qabsiga Isbaddelka Cimilada iyo U diyaargarowga masiibooyinka
ii. Hoos u dhigidda ama yareynta Saameynta Isbaddelka Cimilada

Ujeeddooyinka siyaasadda ayaa la gaari karaa oo keliya marka fiiro gaar ah la siiyo mawduucyada muhiimka ah (cross-cutting themes) ee saameyn kara waaxaha kala duwan. Mawduucyadaas waxa ay kala yihiin: kobcinta awooda, cilmi baarista, tiknoolojiyadda iyo hal abuurka, iskaashi heer gobol iyo mid caalami, wadaagidda macluummaadka, waxbarashada iyo wacyi gelinta dadweynaha iyo in waax kasta qorshaheeda ku darto isbaddelka cimilada.

Si loo gaaro ujeedooyinka Siyaasadda, waa in diiradda la saaro waaxaha laf-dhabarta u ah dhaqaalaha Soomaaliya is la markaana la qeexo sida wax looga qabanayo isbaddelka cimilada. Marka la eego la-qabsashada, waaxaha u baahan fiiro gaar ah waa beeraha, xoolaha, biyaha, kheyraadka badda, dhirta iyo noolaha kala duwan, kaabayaasha dhaqaale iyo caafimaadka bulshada. U adkeysiga dhacdooyinka isbaddelka cimilada waxaa saldhig u ah u diyaargarowga iyo maareynta masiibooyinka dalka soo wajihi kara. Sidaas darteed waa in la dhiso kaabayaal u adkaysan kara isbaddelka cimilada is la markaana la kordhiyo adkeysiga bulshooyinka nugul.

Kaarboonka hawada wasakheeya ee ay Soomaaliya hawada ku sii dayso maaha mid badan. Si kastaba ha noqotee, waddanku waxa uu ku dadaalayaa sidii uu u yareyn lahaa, isagoo eegaya waajibaadka caalamiga ah ee dalka ka saaran yareynta kaarboonka. Waddanku waxa uu qayb ka qaadanayaa dadaallada caalamiga ah ee ku aadan xakameynta kaarboonka is la markaana waxa uu dalku awoodda saari sidii loogu gudbi lahaa dhaqaalaha cagaaran (green economy).

Siyaasaddu waxa kale oo ay ka hadlaysaa xiriirka ka dhexeeya arimaha bulshada iyo isbaddelka cimilada sida caafimaadka, xuquuqul insaanka, shaqada, arrimaha jinsiga (gender) iyo haajirida (migration).

Siyaasaddan waxaa door fulineed ka wada qaadanayaa hay'addaha qaran ee dowladda iyo ururada aan dowliga ahayn. Siyaasaddani waxa ay qeexaysaa kaalinta hay’addahaas ka qayb qaadan doona wax ka qabashada dhibaatooyinka ka dhasha isbaddelka cimilada. Si loo gaadho ka wax ka qabasho wax ku ool ah, Siyaasaddu waxa ay abuuraysaa Guddiyo kala duwan oo ka qayb qaadan doona hirgelinta siyaasaddan.

Si wax looga qabto saameynta isbaddelka Cimilada, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay taageero dhaqaale. Maaliyadda wax looga qabanayo saameynta isbaddelka cimilada waxa ay ka iman doontaa ilaha gudaha (domestic sources) iyo taageerada Beesha Caalamka. Miisaaniyadda dowladda, tabarucaadka ganacsatada, shirkadaha, ururada iyo shaqsiyaadka ayaa ah ilaha dhaqaale ee gudaha. Taageerada caalamiga ahi waxa ay ka kooban tahay laba geesood (bilateral) iyo maalgelinta (sanduuqyada) cimilada ee caalamiga ah (international climate funding sources).

Ugu dambeyntii, si loo hubiyo dhaqan-galka siyaasadda, waxaa muhiim ah in la sameeyo kor-joogteyn iyo qiimeyn wax ku ool ah oo ku aadan tallaabooyinka/jawaabaha isbaddelka cimilada iyo saameyntooda. Siyaasaddu waxay soo jeedinaysaa nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ee loo baahan yahay in lagula socdo wax ka qabashada isbaddelka cimilada.


## CUTUBKA 1aad

## GUUD-MAR, YOOLKA, MABAADI'DA & UJEEDOOYINKA SIYAASADDA

### 1.1. Guud-Marka Siyaasadda

Isbaddelka cimiladu waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waa weyn ee qarnigan waana dhibaato heer caalaami ah oo u baahan xal calaami ah. Khataraha isbeddalka cimiladu waa mid dhinacyo badan leh saameynteeduna waa mid dhaafsiisan xuduudaha waddanka. Guddi-Dowladeedka Isbaddelka Cimilida adduunka (IPCC) ayaa tilmaamaya haddii kaarboonka hawada wasakheeya uu ka bato heerka uu hada taagan yahay, in mustaqbalka aduunyadu wajahi doonto khataro ba'an.

Waxaa la qiyaasayaa in ficilada aadanuhu (anthropogenic activities) ay sababeen kor u kaca heerkulka aduunka ku dhawaad 1.0 ° C marka la barbar dhigo xiligii aduunka aanu warshadaha lahayn. Haddii uu kororku ku socdo heerka hadda uu yahay, sanadaha soo socda (2030 ilaa 2052) heerkulka adduunka waxaa ku kordhi kara ilaa 1.5 ° C.




Celceliska heerkulka adduunka Xigasho: IPCC

Sidaas awgeed Isbaddelka cimilada ayaa ah halista ugu weyn ee haysata aadanaha maanta. Saameynta ba'an ee isbaddelka cimilada waxaa ka mid ah hoos u dhaca ilaha biyaha; wax soo saarka beeraha; faafidda cudurrada; isbeddelo ku dhaca noolaha iyo masiibooyinka dabiiciga ah.

Inkasta oo saamiga ugu weyn ee kaarboonnada hawada wasakheeya uu ka yimaado wadamada horumaray, dalalka soo koraya ayaa noqon doona kuwa saameynta ugu badani ay ku dhacdo. Dhaqaalaha Soomaaliya waxaa uu aad ugu nugul yahay isbaddelka cimilada. Isbaddelka

cimiladu waxa ay saameysay xoola-dhaqatada, caafimaadka, tamarta, beeraha, kaabayaasha dhaqaale, ilaha biyaha, dhulka, kalluumeysiga iyo keymaha.

Soomaaliya waxa ay qayb ka noqotay UNFCCC bishii Disembar 2009, iyada oo ku biirtay waddama aan lagu dabaqayn sharciga yareynta gaasaska (Non-annex 1 country). Soomaaliya ayaa sidoo kale ansixisay heshiiska Kyoto Luuliyo 2010kii. Hawl galkii ugu horeeyay ee la qaaday ayaa waxa uu ahaa diyaarinta Barnaamijka Qaran ee La-qabsashada isbaddelka cimilada. Hadafka barnaamijku waxa uu ahaa in Soomaaliya ay noqoto dal u adkaysan kara isbaddelka cimilada iyadoo fiiro gaar ah la siinayo dhaqaalaha aadka u nugul ee ku tiirsan beeraha iyo xoolaha kuwaas oo ay wiiqeen colaadaha dalka ka dhacay.

Horumarka dhaqaalaha Soomaaliya waxaa halis ku ah saameynta isbaddelka cimilada. Sanadihii la soo dhaafay, Soomaaliya waxay soo martay marxalado adag oo ku saabsan isbaddelka cimilada sida kor u kaca heerarka badda, xaalufka dhirta, yaraanta roobabka, kororka daadadka, abaaro soo noqnoqday iyo dhacdooyin cimilo oo daran. Xaladahaasi waxa ay halis weyn ku yihiin nidaamka dhaqan-dhaqaale iyo qaab-dhismeedka bulshada.

### 1.2. Baahida Loo Qabo Siyaasadda Isbaddelka Cimilada

Soomaaliya waxaa soo wajahay saameynta isbaddelka cimilada oo ay weheliyaan xasillooni darro iyo dhibaatooyin badan oo dhaqaale sida saboolnimo, kaabayaasha dhaalaha oo liita, horumarka dhanka tiknoolojiyadda oo hooseysa iyo hay’addaha dowladda oo aan awood badan lahayn. Ficilada aadanaha ayaa sii kordhinaya saameynta isbaddelka cimilada ee dalka, sida xaalufinta dhirta.

Saameynta Isbaddelka cimilada ay ku leedahay Soomaaliya waa mid muuqata. Masiibooyin cimilo oo badan ayaa horay dalka uga dhacay, kuwaas oo sababay dhimasho, khasaare maal iyo barakac baahsan. Qaabkii uu roobku u di’i jiray iyo xilli roobaadkii isbeddel ayaa ku dhacay taas oo saameyn ku yeelatay wax soo saarka beeraha iyo hab-nololeedka beeralayda. Sidoo kale dalka waxaa ku soo noqnoqda abaaro is daba joog ah oo daba dheeraaday kuwaas oo wax yeeleeyay xoolaha iyo wax soo saarka dalagga. Arrimahaas marka la isku geeyo natiijada ka dhalata ayaa ah cunto yaraan, gaajo, nafaqo-daro, barakac, dhimasho dad iyo xoolo iwm.



Fatahaada Beledweyne, 2020 Xigasho: www.hiiraan.com

Hadaba si wax looga qabto saameynta Isbaddelka cimilada, waxaa lagama maarmaan ah in la dejiyo Siyaasadda Isbaddelka Cimilada, taas oo wax ka qaban doonta waaxaha kala duwan ee muhiimka u ah dhaqaalaha dalka iyo siddii loo la-qabsan lahaa Isbaddelka cimilada.

Arrimaha Isbaddelka cimilada waa in lagu daro dhammaan qaybaha kala duwan ee qorshayaasha dowladda. Balanqaadka ay sameysay dowladda Soomaaliya ee lagu qeexay (INDC, 2015) iyo (INC, 2018) waxa ay muujinayaan muhiimadda ay leedahay in la dejiyo siyaasad wax looga qabto Isbaddelka cimilada taas oo ujeeddadeedu tahay la qabsiga iyo yareynta saameynta kala duwan ee Isbaddelka cimilada.

Siyaasadda qaran ee Isbaddelka Cimiladu waa saldhigga dadaallada dalka ee ku aadan siddii loo gaadhi lahaa dhaqaale u adkaysan kara Isbaddelka cimilada oo waara. Sidoo kale, Siyaasaddan ayaa ah mid muhiim u ah hirgelinta iyo gaarista Yoolalka Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (Sustainable Development Goals – SDGs, 2015) iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka 9-aad. Isbaddelka cimilada iyo masiibooyinka dabiiciga ah ayaa khatar weyn ku ah Soomaaliya. Ujeedada Siyaasaddan ayaa ah wax ka qabashada arrimaha Isbaddelka cimilada, kor u qaadida horumarka waara iyo gacan ka gaysashada gaaridda yoolalka horumarineed ee dalka, iyada oo la abuurayo barwaaqo iyo dhaqaale (waddan) u adkaysan kara Isbaddelka cimilada.

### 1.3.Hanaanka loo Maray Diyaarinta Siyaasadda

Siyaasadda Isbaddelka cimilada ee Soomaaliya waxaa la diyaariyay iyada oo ay si firfircoon uga qayb-qaadanayeen daneeyayaal kala duwan kuwaas oo gacan buuxda ka gaystay dhamaystirka siyaasadda. Waxaa wada tashiyo lala yeeshay mas’uuliyiinta dowlada federaalka,

xubno ka mid ah maamul goboleedyada, ururada bulshada rayidka ah, ururada aan dowliga ahayn, haya’adaha caalamiga ah iyo guddida u xilsaaran ilaalada deegaanka ee golaha shacabka Soomaaliya.
Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ayaa hogaaminaysa dejinta siyaasaddan waxaana taageero ka gaystay Haya’adda Barnaamijka Horumarinta Aduunka ee Qaramada Midoobey iyo Barnaamijka Taageerida Deegaanka ee loo yaqaan (GEF).

### 1.4.Hiigsiga Siyaasadda (Vision)

Gaaritaanka barwaaqo iyo dhaqaale u adkeysan kara saameynta isbaddelka cimilada, iyada oo la qaadayo tallaabooyin wax ku ool ah oo ku aadan la-qabsiga Isbaddelka cimilada iyo yareynta kaarboonka hawada wasakheeya.

### 1.5.Hawlgalka Siyaasadda (Mission)

Xoojinta awoodda iyo isku xidhka hay’adaha dowladda, bulsho iyo daneeyayaasha kale si ay awood ugu yeeshaan la qabsashada, hoos u dhigidda khataraha masiibooyinka iyo yareynta kaarboonka hawada wasakheeya, taas oo gacan ka geysan karta gaarista qorshayaasha horumarinta qaran iyo yoolalka horumarka waara.

### 1.6.Mabaadi'da Siyaasadda

Mabaadiida ay siyaasaddani ku salaysan tahay waa:

i. **Xuquuqda Horumarka Waara**: barnaamijyada iyo qorshayaashu waa in ay keenaan saameyn wanaagsan oo ah xag dhaqaale, bulsheed iyo deegaan. Xaquuqda horumarku waxa uu taaba gal noqonayaa markaa uu saameyntaas keeno. Ujeeddadu waxa weeye in la gaadho hab-dhaqan horumarineed oo kor u qaada awoodda aadamaha iyo bad-qabkooda.

ii. **Mudnaan siinta dadka iyo gobollada nugul**: waa in la hubiyo siddii mudnaan loo siin lahaa gobollada iyo bulshada u nugul saameynta isbaddelka cimilada. Waa in dadweynuhu ay qayb ka yihiin go'aan qaadashada waxyabaaha iyaga saameynaaya iyo in ay jiraan habab fal celineed oo wax ku ool ah.

iii. **Xog ku dhisan Cilmi**: adeegsiga xogta ku salaysan sayniska iyada oo la qaddarinayo muhiimadda aqoon-dhaqameed. Fursadaha la qabsiga iyo tiknoolojiyadda waa in ay noqdaan kuwo ku habboon dalka oo la awoodi karo si loo hirgeliyo siyaasadda.

iv. **Iskaashiga Caalamiga ah**: In la kobciyo iskaashiga wax ka qabashada Isbaddelka cimilada ee heer gobol iyo mid caalami.

v. **Wada shaqeynta dowliga**: Siyaasaddani waxa ay salka ku haysaa oo ay la jaan-qaadeysaa horumarinta qaranka, sharciyada Federaalka, waajibaadka caalamiga ah iyo balan qaadyada dalka. Hannaanka wada shaqeynta dowladdu waxa uu noqonayaa mid isu dheelitiran, wadatashi heer qaran iyo heerarka kale duwan ee dowladda.

vi. **Maamul daadejin:** Maamul daadejinta waxaa ka mid ah baahinta awoodda Dowladda Federaalka iyadoo tallaabooyinka wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada ay qaadayaan heerarka kala duwan ee dowladda.

vii. **Ka dhex muuqasho (mainstreaming)**: arrimaha Isbaddelka cimiladu waa in ay ka dhex muuqdaan ama la tixgeliyaa marka la samaynaayo siyaasadaha waaxyaha (sectoral policies) kala duwan.

viii. **Sinnaanta, Caddaaladda iyo Isdhexgalka Bulshada:** mashaariicda isbaddelka cimiladu waa in ay noqdaan kuwa loo simman yahay faa'iidooyinkooda. Waa in la taageeraa dadka jilicsan iyo dadka liita iyada oo la aqoonsanayo u nuglaantooda isbaddelka cimilada.

ix. **Mudnaan siinta La-qabsiga Isbaddelka Cimilada:** maadaama uu yar yahay xadiga qaaca hawada dalku ku sii daayo, dowladda Soomaaliya waxa ay mudnaan siinaysaa la-qabsiga isbaddelka cimilada.

## 1.7. Ujeeddooyinka Siyaasadda

Siyaasadda Isbaddelka Cimilada ayaa hagi doonta tallaabooyinka qaran ee wax looga qabanayo saameynta Isbaddelka cimilada. Ujeeddooyinka siyaasaddu waa in la horumariyo lana xoojiyo la-qabsiga iyo hoos u dhigidda halista masiibooyinka ka dhalan karta si loo yareeyo u nuglaanta Isbaddelka cimilada. Siyaasaddu waxa kale oo ay dhiirri gelinaysaa maal-gashiga dhaqaalaha cagaaran iyo yareynta qaaca.

## 1.8. Hirgalin/Dabaqid

Siyaasaddani waxa ay gacan ka geysan doontaa hagidda hay'addaha dowliga, kuwa aan dowliga ahayn, ururada rayidka iyo cid kasta oo ku hawlan wax ka qabashada arrimaha Isbaddelka cimilada.

# CUTUBKA 2aad
# WAAQACA SIYAASADDA

## 2.1.Waaqaca Isbaddelka Cimilada ee Heer Caalami iyo mid Gobol

Isbaddelka cimiladu waxa weeye mid ka mid ah caqabadaha ugu ee qarnigan iyada oo ay sabab u tahay saameynta baahsan ee ay ku yeelan karto bulshada, ganacsiga, dhaqaalaha iyo deegaanka. Warbixinadda Hay'adda IPCC waxa ay tilmaamaysaa in kororka xadiga qaaca hawada wasakheeya. Marka qaacani hawada ku bato uu dhalin doono dhacdooyin cimilo oo daran sida abaaro, daadad, dabargo'a noolaha kala duwan, isbaddelka xilli roobaadka iyo guud ahaan kor u kaca masiibooyinka dabiiciga ah.

Isbaddelka cimilada iyo burburka deegaanku waxa ay ka mid yihiin arrimaha sababi kara barakaca gudahaa iyo tahriibka caalamiga ah. Waxaa la ogaaday in masiibooyinku ay barakiciyeen in ka badan dadka ay baraka kiciyeen dagaalad (GRID, 2019). Sidoo kale, warbixin uu soo saaray Bangiga Adduunka ayaa lagu qiyaasayaa in Isbaddelka cimilada uu khasbi doono qiyaastii 140 milyan oo qof oo barakacayaal ah sanadka 2050.

IPCC waxa ay qortay in Afrika ay tahay mid ka mid ah gobollada ugu nugul saameynta Isbaddelka cimilada. Saameynti waxay noqon kartaa mid taban ama togan oo la xiriirtaa wax soo saarka cuntada, ilaha biyaha, caafimaadka darada bini'aadamka, wiiqida khyaraadka dhul xeebeedka iyo guud ahaan deegaanka. Waddama Bariga Afrika ayaa khatar ugu jira abaaro baahsan, daadadka, cunto yare, iyo saboolnimo. Soomaaliya waxaa marar badan soo wajahay saameynta ba'an ee Isbaddelka cimilada sida kororka masiibooyinka (daadad iyo abaaro), kuwaas oo saameyn daran ku yeeshay bulshada nugul.

Waxaa jira caddeymo muujinaya in isbaddelka cimiladu mustaqbalka sii xumeyn doonto dhibaatooyinkaas, taas oo horseedi doonta saameyn dhaqan-dhaqaale iyo mid bulsho. Jawi cimileedka El Niño ayaa sababa kala duwanaanshaha heerka roobka ee Bariga Afrika. El Niño waxay caadi ahaan sababtaa roobab waa weyn oo ka da'a bariga Afrika (oo ay Soomaaliya ku jirto) kuwaas oo keena fatahaado.

## 2.2.Waaqaca Dalka

Sannadkii 2012kii, Soomaaliya waxa ay fursad u heshay in la dhiso dowlad Federaal ah taas oo heshay taageero xoog leh iyo aqoonsiga beesha caalamka. Dastuur qaran oo ku meel gaar ah ayaa la ansixiyay bishii Juun 2012, isaga oo udub-dhexaad u noqday nidaamka Federaalka ee dalka.

Waddanku wuxuu si rasmi ah u bilaabay hirgelinta nidaam Federaal ah. Qodobada 25 & 45aad ee Dastuurka ku meel gaarka ee Soomaaliya ayaa si gaar ah u sharaxayaa arrimaha ku saabsan ilaalinta deegaanka iyo maamulka kheyraadka dabiiciga ah. Intaa waxaa dheer, Qorshaha Horumarinta Qaranka (9aad) ayaa ka hadlaya muhiimadda deegaanka iyo isbaddelka cimilada.

Isbaddelka cimilada iyo khatarta ay keenayso ayaa la aqoonsaday. Wadanku wuxuu ugu nugul yahay Isbaddelka cimilada sababtoo ah dalku waxa uu ku tiirsan yahay dhaqashada xoolaha,

wax soo saarka beeraha iyo kheyraadka dabiiciga ah kuwaas oo u nugul Isbaddelka cimilada. Awoodda Soomaaliya waa mid yar, dalkuna waxa uu ka mid tahay waddamada ugu nugul dhanka Isbaddelka cimilada. Heerkul ka waddanku sare ayuu u kacay, roobabkuna way yaraadeen, taas oo keentay abaaro is daba joog ah iyo macaluul. Tan iyo horraantii 1980-maadkii, waddanka waxa soo gaaray todoba (7) abaarood oo waa weyn, kuwaas oo shan ka mid ah horseedeen macaluul.



Fatahaadii, 2019 Xigasho: BBC, 2019

Barnaamijka la qabsiga ee Soomaaliya ee Howl-gallada Isbaddelka Cimilada (NAPA) wuxuu qeexayaa dhinacyada muhiimka ah ee diiradda la saarayo iyo hirgelinta ku habboon Isbaddelka cimilada. Xeelado iyo istiraatiijiyooyin badan ayaa waxaa fuliyey hay'ado kala duwan sida UNDP, FAO iyo WHO si wax looga qabto saameynta Isbaddelka cimilada ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, wax qabadyadan dhacayey ee la xiriira arrimaha isbaddelka cimilada ma lahayn siyaasad hagta.

Siyaasaddan waxay muujineysaa in Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (FGS) ay ka go'an tahay diyaarinta wax ka qabashada Isbaddelka cimilada, yareynta nuglaanshaha iyo dhisidda adkeysiga dadka Soomaaliyeed. Siyaasaddu waxa ay Soomaaliya u suurta gelinaysaa inay hesho taageero dhaqaale oo wax looga qabanayo saameynta isbaddelka cimilada.

Dhamaysitirka Siyaasadda Isbaddelka Cimilada Qaranka ee Soomaaliya waxa ay u jeedadiisu tahay in la kordhiyo awoodda u adkaysiga Isbaddelka cimilada ee bulshooyinka jilicsan iyo ilaalinta deegaanka. Sidoo kale Siyaasaddu waxay qeexaysaa siddii loo kala dooran lahaa ama mudnaan loo siin lahaa hababka loola qabsanaayo Isbaddelka cimilada iyo in sidoo kale la helo dhaqaalaha lagu maareynayo.

## CUTUBKA 3aad
## FALANQAYNTA XAALADDA IYO SAAMEYNTA ISBADDELKA CIMILADA EE SOOMALIYA

### 3.1.Caddeynta Isbaddelka Cimilada iyo Saadaasha Soomaliya

Isbaddelka cimiladu siyaabo kala duwan ayuu u saameysay Soomaaliya. Tan ayaa laga dheehan karaa marka la eego isbaddelka heer-kulka, roobka, kor u kaca heerka badda iyo xaaladda cimilada daran (abaaraha & fatahaadaha).

#### 3.1.1. Isbaddelka Heerkulka

Isbaddelka heerkulka ba'an ee ka jira Soomaaliya ayaa la arkay 50kii sanno ee la soo dhaafay. Muddo qarni ah, heerkulku wuxuu kordhay 1.0 ° C. Heerkulka celceliska hawada ayaa weli sarreeya sanadka oo dhan iyadoo heerkulka maalinlaha ah ee mudadii u dhaxaysay 1953-1976 uu ahaa 25.2 ° C ilaa 28.8 ° C taas oo celcelis noqonaysa sanadkii 27 ° C. Isbadbadelka heerkulka oo sarreeya waxaana uu u dhaxeeya 20 ° C ilaa 35 °C.

Heerkulu waxa uu aad u sareeyaa dhulka aan xeebaha ahayn halka heerkulku uu hooseeyo xeebaha koonfurta taas ay sababtu tahay qabawga mawjadaha badwenyta. Heerkulka tooska ah ee ka jira koonfurta ayaa wax u dhimi kara dhulka joogiisu sareeyo ee Waqooyiga, taas oo keenta in heerkulku hoos ula dhaco hadba jooga dhulka celcelis xaddidan maalin kasta oo ah qiyaastii 6 ° C halkii 1000m. Si kastaba ha noqotee, qiyaasta hoos u dhaca waxay ku xiran tahay isbedellada xilliyeed ee sanadka oo dhan, iyadoo aad xilliga qallalan uu ka badan yahayba marka loo eego xilliga qoyan.

Qiyaasihii u dambeeyay waxa ay muujinayaan in uu jiro korodh joogto ah gobollada waqooyiga, bartamaha iyo Koonfurta ee Soomaliya. Kororka heerkulku waxa uu ku xidhan yahay xilliga, kororka joogtada ah waxa uu noqonayaa inta u dhaxaysa 0.3 - 0.5°C tobankii sanno illaa 2050. Si kooban, heerkulka celceliska waxaa la filayaa in kor u kaco Soomaliya inta u dhaxaysa 3 ° C iyo 4 ° C sanadka 2080ka.

#### 3.1.2. Isbaddelka Qaabki uu u di’i jiray Roobku

Xaaladda isbaddelka cimilada ayaa keentay in xaddigii roobka di’i jiray uu aad hoos ugu dhaco is la markaana uu noqday mid aan la saadaalin karin. Guud ahaan xaaladaha cimilada ee Soomaaliya waa mid kulul oo oomane ah, waxaana saameeya Dabaylaha Aaga Kulaalaha (Tropical Convergence Zone) (IUCN, 2006). Dalka waxaa ka da’a laba xilli roobaad, kuwaas oo ah: roobabk Guga (Abriil ilaa Juunyo) iyo roobka Deyrta (Oktoobar ilaa Nofembar). Jiilaalka iyo Xagaagu waa qaleyl, in kasta oo xilliyadan dambe roob ka da'o meelaha xeebaha.

Waxaa la saadaalinayaa in uu isbadel ku imanayo habkii roobku u di’i jiray, marka dhan kasta laga eego. Roobka sannadle ah ee Soomaaliya ayaa la filayaa inuu kordho intii u dhaxaysay 1981-2000, 1%, 3% iyo 4% 2030, 2050 iyo 2080, siday u kala horreeyaan. Hase yeeshee, roobabka ka da’a gobollada dhexe iyo Koonfurta Soomaaliya ayaa la filayaa ay yaraadaan inta

lagu jiro bilaha Maarso, Abriil, iyo May (MAM) marka la gaadho 2080ka. Marka aynu soo koobno waxaa jiri doona sare u kac ah xidiga roobka ee Soomaaliya.

### 3.1.3. Xaaladaha Cimilo ee Ba’an

Soomaaliya waxaa soo maray dhacdooyin cimilo oo aad u ba'an sida: abaaro, daadad, duufaano iyo sunaami (tsunami). Abaaraha iyo fatahaada ayaa ah masiibooyinka ugu badan ee soo noqnoqda. Abaartu waxa ay saameyn ba’an ku yeelatay dhaqaalaha dalka. Sanadihii u dambeeyay, abaartu waxa ay saameysay in ka badan 70% dadka Soomaaliyeed (INDC, 2015). 50-kii sano ee la soo dhaafay dalka waxaa soo wajahay iIlaa 14 xaalado abaareed oo waa weyn kuwaas oo saameeyey in ka badan 6 milyan oo qof (INDC, 2015). Sidoo kale, fatahaada webiyada Jubba iyo Shabeelle ayaa saameeya gobollada Hiiraan iyo Shabeellooyinka. Dhulka xeebaha ee Soomaaliya waxay u nugul yihiin duufaano iyo sunaami (tsunami). Sanadkii 2004-tii waxaa waddanka soo gaadhay khasaare maal iyo nafeed oo ka dhashay Sunamigii ka kacay Badweynta Hindiya. Marka la eego adduunka sii kululaanaya, duufaanada Badweynta ayaa khatar weyn ku ah Soomaaliya.



Abaartii 2017 Xigasho: Finnish Red Cross (via Google images)

Soomaaliya awooddeedu way xadidan tahay (ama awood uma laha) la tacaalidda masiibooyinka waa weyn sida Sunaami, duufaano, abaaro daba dheeraaday iyo daadadka El Nino. Isbaddelka cimilada waa xaqiiqo la ogsoon yahay. Sidaas darteed, si loo gaadho Yoolalka Horumarka Waara (UN SDGs, 2015) iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2020 – 2024, waxaa muhiim ah in la qaado tallaabooyin lagu la qabsanayo Isbaddelka cimilada.

### 3.1.4. Heerkulka Oogada iyo kor u kaca heerka badda

Heerkulka oogada badda ee xeebta Soomaliya ayaa ku taala 20-yeeda illaa 130 Waqooyi iyo 520 -Bari illaa 550E waxay muujinaysaa isbeddel tartiibta ah heerkulka 0.4°C mudo ka badan 26 sano (1981-2007). Ma jiraan wax macluumaad ah oo laga heli karo xeebaha Soomaaliya oo loo isticmaali karo in ay caddeeyaan kor u kaca heerka badda ee la filayo. Laakiin waxaa jiraa

diiwaan bille ah (meanly) oo 15-sano ah (1995-2010) kaas oo diiwaan geliyay heerka badda ee Lamu, Kenya ee ku taal xeebta Bariga Afrika. Diiwaankaasi waxa uu muujinayaa isbeddel sare u kac oo ah 1.3 mm sanadkii, taasoo la mid ah Isbaddelka caalamka ee sare u kaca badda.

Magaalada Mombasa oo qiyaastii 500km u jirta Lamu, Kenya ayaa iyada muujinayso isbeddel la mid (oo 25-sano (1986-2010) inkastoo ay jiraan xog ka maqan diiwaankan. Xeebta Soomaaliya waxa ay masaafo aan badneyn u jirta Lamu, Kenya (Bariga Afrika), waxayna u badan tahay in ay ku timid Isbaddelka kaas la mid ah. Tani waxaa lagu xaqiijin karaa duruufaha badda ee labada xarumood oo aad isugu dhow. Dhamaadka sanadka 2099, Soomaaliya waxa ay filan kartaa kor u kaca heerka badda oo ah 50cm ee xeebaha Badweynta Hindiya.

## 3.2.Saameynta Isbaddelka Cimilada ee Soomaaliya

Isbaddelka cimiladu wuxuu raadreeb xun ku yeeshay nolashii deegaanka ee caadiga ahayd, inta badanna waxa ay aad u saameysay dhulka lama deegaanka ah iyo lama deegaan xigeenka (ASAL). Dhulka lama deegaanka ah iyo lama deegaan xigeenka (ASAL) oo ah 80% dhulka ka ay Soomaalidu degto ayaa ah deegaanno aad u liita kuwaas aan helin maalgelin iyo adeegyada aasaasiga ah ee ay dowladdu bixiso waana meelaha looga cabsida qabo inay saameyso Isbaddelka cimiladu. Saameynta ay keento Isbaddelka cimiladu wuxuu gaadhaa qaybaha bulshada, dhaqaalaha iyo deegaanka. Saameynta ba'an ee Isbaddelka cimilada ayaa raad reeb ku yeelan kara horumarka dhaqaale, bulsheed, iyo siyaasadeed ee meelaha muhiimka ah ee Soomaliya. Saameyntu waxa ay ka muuqataa arrimaha soo socda:

### 3.2.1. Saameynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada

Sugnaanta cuntada iyo nafaqada ee Soomaliya ayaa ka mid ah meelaha ay sida daran u saameeyeen Isbaddelka cimiladdu, taas oo ay ugu wacan tahay burburka dhulka iyo abaaraha. Dhibaatooyinka cimilada sida duufaannada, daadadka, iyo abaaraha ayaa awood u leh inay burburiyaan dalagyada, hantida muhiimka ah ee bulshada iyo kaabayaasha muhiimka ah sida webiyada, wadooyinka iyo isgaadhsiinta kuwaas oo muhiim u ah wax soo saarka cuntada. Soomaaliya waxay leedahay mid ka mid ah xeebaha ugu dheer qaaradda Afrika. Isbaddelka cimiladu wuxuu sababay kor u kaca heerka Badda iyadoo la filaayo in ay si xun u saameyso hab-nololeedka deegaanka xeebaha iyo webiyada. Isbaddelka xaaladaha cimilada ayaa hore u saameeysay wax soo saarka cuntada. Sidoo kale kor u kaca heerkulka ayaa saameyn doona tayada iyo tirada wax soo-saarka beeraha.

Guud ahaan Soomaaliya, helitaanka cuntada ayaa noqotay caqabad sii kordhaysa iyada oo ah arin dhalin karta khatar amni iyo dhaqaale. Isbaddelka cimiladu waxay horey u keentay kororka qiimaha abuurka beeraha, cuntada khudaarta iyo cuntooyinka jilicsan. Wax-soo saarka beeraha oo hooseeya macnaheedu waa beeralayda dakhligooda oo hoos u dhaca. Xaaladahaas oo kale waxa ay keenaysaa in ay awood u yeelan waayaan sidii ay maareyn lahaayeen baahidooda nafaqo. Tan ayaa keeni karta kororka xaalado caafimaad darro iyo macaluul.

Isbadelada cimiladu waxay saameeyaan nafaqada sababtoo ah waxa ay saameyn ku leedahay kala duwanaanta cuntada, sugnaanta cuntada, isticmaalida iyo daryeelka caafimaadka. Intaa waxaa dheer, Isbaddelka cimilada ayaa sii kordhaaya oo soo keena xaalado cimilo oo aad u xoogan oo xanibaya istaraatijiyada sugnaanta cuntada. Sidaa awgeed, si loo abuuro sugnaanta cuntada waxaa loo baahan yahay in la sameeyo hab-dhaqan horumarineed oo wadajir ah wakhtig dhow iyo mid ka fog.

### 3.2.2. Saameynta Wax Soo Saarka Beeraha, Xoolaha & Kalluunka

Wax soo saarka dalagga iyo xoolaha ayaa ah ilaha ugu muhiimsan ee hab-nololeedyada beeralayda iyo xoola dhaqatada ee Soomaaliya, iyada oo in ka badan 70% nolosha Soomaalidu ku xidhan tahay xoolo dhaqashada iyo beeraha. Gadgadoonka cimilada (climate variability) ayaa si daran u saameyn doona kheyraadka dabiiciga ah ee jilicsan ee taageera xoolaha, taas oo ah laf-dhabarka dadka iyo dhaqaalaha Soomaaliya.

Hoos u dhac ku yimaada dhirta iyo awoodda wax soo saar ee dhulka, oo ay ku jirto abaaro isdaba joog ah oo soo noqnoqda, waxay si xun u saameeyaan wax soo saarka xoolaha ee gobollada. Wax soo saarka beeraha yaryar ayaa muujinaya hoosaynta dhaqaalaha iyo nuglaanta sare ee dadweynaha Soomaliyeed ee ku aaddan dhibaatooyinka bulsho iyo dhaqan-dhaqaale ee ay ragaadiyeen xaaladaha cimilada ee dalka. Kor u kaca badda iyo heerkulku waxa ay sameeyeen nidaamka deegaanka iyo noolaha. Isbaddelka cimiladu waxa ay saamaysay kalluunka Soomaalida iyo soo saarista noocyada kheyraadka biyaha badda iyo biyaha kale, taas oo si ba'an u saameynaysa wax soo saarka kheyraadka badda.

### 3.2.3. Saameynta Deegaanka, Biyaha iyo Keymaha

Isbaddelka cimiladu waxay saameyn xun ku yeelatay deegaankii caadiga ahaa ee Soomaaliya. Hoos u dhaca tayada deegaanka ayaa horseeday saameyn dhaqaale iyo mid bulsho taasoo horseedi karta hoos u dhac ku yimaad tayada nololeed ee dadka. Mid ka mid ah meelaha dhibta ugu badan ay soo gaadhay waa goobaha (lama deegaanka iyo lama deegaan xigaha) sababtoo ah waxa aad u sareeya u nuglaanshaha Isbaddelka cimilada waxayna u baahan yihiin maalgashi ku filan si loo dhiso adkeysi iyo kordhinta kartida waxqabad. Abaaraha & daadadka soo noq-noqda ayaa loo aaneyn karaa Isbaddelka cimilada.

Kheyraad biyaha ee Soomaaliya ma badna is la markaana waaxda biyuhu ma horumarsana. Biyaha u badan ee uu dalku isticmaalo waa biyaha dhulka korkiisa/dushiisa (surface water) (INC, 2018). Koonfurta Soomaaliya waxaa mara labada webi ee Jubba iyo Shabeelle.

Waxaa la rumeysan yahay in ay jiraan kheyraadka biyaha dhulka hoostiisa (aquifers) laakiin si buuxda wali looma darsin (qiimeyn). Ceelasha biyaha ee hada jira waa ku yar yar oo farsamadoodu hooseyso mana jiro fahan badan oo ku saabsan saamaynta ceelashaasi ay yeelan karaan (INDC, 2015). Wakti xaadirkan (hada) ma jiro kormeer isku duuban iyo fahamka ilaha biyaha ee Soomaaliya. Sidaa darteed, waxaa loo baahan yahay qiimeyn guud si loo fahmo

kheyraad biyaha ee dalka iyo saameynta Isbaddelka cimilada ee biyaha. Ujeedada Siyaasaddani ah wax ka qabashada arrimahaas.

Dhirta Soomaaliya waa dhirta dhulka qalalan oo ay ka midka yihiin noocyada Acacia iyo Camiphora. Waxaa kale oo jira dhul-daaqsiimeed iyo yar yar (gaaban) oo ka baxda dhulka Soomaaliya. Guud ahaan, dhirtu waxa ay ku badan tahay xagga koonfurta dalka. Dhanka waqooyiga-bari ee dalka ayaan lahayn geedo ama aad ayay u yar yihiin. Wadarta guud ee dhulka keynta (forest coverage) ah ayaa lagu qiyaasaa 14% (90,000 km2) dhulka Soomaaliya (INC, 2018). Koriinka/bixida geedaha guud ahaan way xadidan tahay taasina waxaa sababay carrada oo nafaqadeedu hooseyso iyo roobka oo yar, kuwaas oo ah raad-reebka saameynta Isbaddelka cimilada.

### 3.2.4. Xaalufinta Dhirta iyo Nabaad Guurka

Soomaaliya waxaa la filayaa in xadiga heerkulku uu sare u kaco mustaqbalka. Guud ahaan, caqabadaha ugu waa weyn ee dalka soo waajahay waxay ka yimaadaan sare u kaca xaalufka dhulka. Nasiib darro, saameynta xun ee Isbaddelka cimilada ayaa sii kordhinaysa xaalufka deegaanka. Sidaas awgeed, baahi ayaa loo qabaa in lagu dhaqaaqo tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu fulinaayo shuruucda iyo qawaaniinta ilaaliya isticmaalka kheyraadka dabiiciga ah.

Dhibaatada dhulka ee Soomaaliya waxaa sababa hawlaha bini'aadamka sida daaqsinta xad dhaafka ah, geedaha oo la gooyo iyo nidaamka beerashada oo liita. Dhir jarida aan xadka lahayn ayaa waxay keentay inuu kordho xadiga gaasta wasakhaysan ee ku jirta hawada taas oo baabiisay deegaanadii ay ku noolaayen noolayaashu. Kororka daadadka iyo dabayluhu waxay keeneen carro guur iyo in deegaankii lagu noolaan lahaa uu burburo. Nabaad guurka ayaa sababa in ay yaraato dhirtu taaso keenta in uu kordho Kaarboonku. Sidoo kale waxaa burbura hoygii noolayaasha kala duwan.. Korodhka daadadka iyo dabayshu waxay dhalinayaan nabaad guur, jeexjeexyada iyo daadadka, taas oo baabi'isa hab-nololeedyada. Maadaama inta badan dhaqaalaha Soomaaliya uu ku tiirsan yahay helitaanka biyaha roobka, waddanku waxa uu la kulmi doonaa khataraha sii kordhaya ee cimilada haddii aan la hirgelin nidaam la qabsasho.

### 3.2.5. Saameynta Caafimaadka

Isbaddelka cimilada ayaa si aad ah u saameeyay caafimaadka dadka Soomaaliya. Soomaaliya waxaa ka jira khatar sare oo ah cudurrada faafa ee xasaasiga ah sida cudrada ka dhasha cuntooyinka, biyaha, cudurada ay keenaan cayayaanka ama sideyaal. Cudurada ay sababaan sideyaashu (bakteeriya, fayras iwm) ayaa dalka ku badan. Guud ahaan, waxaa jira kororka dhimashada xoolaha iyo dadka, yaraanta cuntada oo horseedayso nafaqo-darro, gaar ahaan carruurta, hooyooyinka iyo dhalinyarada iyo kor u kaca cudurada ku dhaca maskaxda. Sidoo kale, waxaa jira xaalado badan oo neef qabatow ah, oof-wareenka iyo cudurrada kale ee ku dhaca hab dhiska neef mareenka. Waxa kale oo dalka lagu arkay dhibaatooyin caafimaad oo ka dhashay falaadhaha qoraxda, fuuq-baxa iyo faaligga (heat stroke). Daadadka iyo abaaruhu waxa ay horseedi karaan burburka adeegyada caafimaadka, cudurrada faafa iyo in goobaha xarumaha caafimaadka culeys xad-dhaaf ah la saaro.

Sidaa daraadeed, waddanku wuxuu ku dadaalayaa inuu hagaajiyo xaaladda caafimaadka iyada oo loo maraayo dejinta iyo kobcinta xarumaha caafimaadka, sii wanaajinta barnaamijka nafaqada ee heer bulsho, abuurka hababka digniinta xiliga hore ah iyo hagaajinta tayada biyaha. Waxaa intaa dheer, dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadku waxay u baahan karaan tababar ku saabsan sida loola tacaalayo dhibaatooyinka caafimaad ee la xiriira cimilada, abuurida nidaamyada maareynta qashinka iyo in la sameeyo wacyigelin caafimaad.

### 3.2.6. Saameynta Badda iyo Xeebaha

Bulshada Soomaaliyeed waxay ku xiran tahay kheyraadka badda iyo xeebaha, iyada oo dad badan ay ka shaqeeyaan kaluumeysiga ama hawlaha la xiriira kaluumeysiga. Kororka neefaha wasakheeya hawada iyo Isbaddelka cimilada ayaa saameyn doona kiimikada iyo qaab dhismeedka biyaha xeebaha Soomaaliya iyada oo ay dhici karto isbadel dhanka milixda ah, heerkulka oogada, fal-celinta kiimikada, wareegyada guud ee gaasaska kala duwan, kororka neefaha wasakheeya hawada iyo khatar ka dhalan karta khafiifidda dahaarka hoose ee cirka ee Ozone ka. Kororka heerkulka iyo heerarka badda iyo roobabka aan joogtada ahayn ayaa caqabad weyn ku ah caafimaadka iyo habka shaqo ee nolosha xeebaha. Deegaanka xeebuhu aad ayay ugu nugul yihiin Isbaddelka cimilada.

Burburka ku yimid deegaanka xeebaha waxa uu keenay hoos u dhaca dhulki ay wax ka bixi jireen, dhimashada xayawaanka duur joogta ah iyo hoos u dhaca ciiddi/caradii ku haboonayd wax beerashada. Baahida badan iyo maareyn la’aantu waxa ay sababeen in kheyraadka xeebaha la waxyeeleyo sida keymaha MANGROVE oo la baabiiyay. Hirgelinta Himilada Qaranka Soomaaliya 2030 waxa ay u baahan tahay in la xoojiyo kheyraadka dabiiciga iyadoo maalgelin balaadhan si kor loogu qaado tayada iyo tirada kheyraadka ee sii yaraanaysa. Sidaa daraadeed, Soomaaliya waxa ay qorsheynta waxqabad ku dari doontaa arrimaha ku saabsan Isbaddelka cimilada si hoos loogu dhigo u nuglaanshaha isbadeladaas.

### 3.2.7. Saameynta Kaabayaasha

Horumarinta iyo kobcinta kaabayaashu waxay faa’iido u leedahay horumarinta dhaqaale iyo bulsho ee waddanka. Himilada Soomaaliya ee 2020 iyo 2030 waxay dhiirigalinaysaa in si aada loo yareeyo waxyaaba keenaaya hoos u dhaca dhaqaalaha, caafimaadka oo liita iyo jiritaan la’aanta waxbarasho dadka ku filan.

Kheyraadka dabiiciga ah ee ugu weyn Soomaaliya waa biyaha, dhulka, macdanta, xeebaha iyo kheyraadka badda, keymaha, geedaha iyo noolaha kala duwan. Ujeedada ugu weyn ee hiigsiga 2030 waa in la kordhiyo maalgashiga badbaadinta deegaanka, gaadiidka isgaadhsiinta, iyo tamarta.

Waxaa jirta baahi loo qabo in la horumariyo maalgashiga kaabayaasha si loo horumariyo dhaqaalaha isla markaana loo abuuro fursado shaqo. Xoojinta iyo joogtaynta adeegyada iyo kaabayaashu waxa ay sahlayaan in waqtiyada dhibaatada, dadweynuhu ay helaan adeegyada bulshada sida biyo nadiifa iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah.

### 3.2.8. Saameynta Horumarka Dhaqaale

Soomaaliya waa dal dakhligiisu hooseeyo ama sabool ah. Isbaddelka cimiladu wuxuu u khatar ku yahay kobaca dhaqaalaha dalka. Waxaa jira caddayn cad oo lagu muujinaayo saameynta ba’an ee Isbaddelka cimiladu ku keentay dhaqaalaha qaranka Soomaaliya, gaar ahaan qaybta beeraha iyo xoolaha. Inta badan dadka Soomaalidu waxay ku tiirsan yihiin beeraha iyo xoolaha si ay u helaan nolol-maalmeedkooda. Si kastaba ha ahaatee, wax soo saarka beeraha ayaa waxa si weyn u saameeya Isbaddelka cimilada sida abaaraha, daadadka iyo macluusha.

Tiro badan oo xoolo ah ayaa cadaadis weyn saaraya dhul daaqsimeedka taas oo keentay xaalufka dhul-beereedka iyo isku dhacyada lahaanshaha dhulka. Isku dhacyada ugu badan waxaa keena muran ka dhasha la haanshaha kheyraadka muhiimka ah sida dhulka iyo biyha.

Cudurrada dillaacay ee badanaa ku dhaca xoolaha ayaa Soomaaliya ka lumiyay dakhli aad u weyn oo laga soo saari jiray dhoofinta xoolaha iyada oo la mamnuucay dhoofintii xoolaha. Abaarta ayaa iyana si ba'an u saameysay kheyraadka biyaha iyo wax soo saarki beeraha. Sida ku xusan warbixinta Qiimaynta Saameynta Abaarta iyo Baahiyaha Soomaaliya (DINA), khasaaraha dhaqaale ee ka dhashay abaartii sanadkii 2016/17 waxaa lagu qiyaasay US $ 3.25 billion (NDP, 2020-2024).

### 3.2.9. Saameynta Isu-socodka/Haajiridda (Migration)

Raadreebta gurracan ee Isbaddelka cimilada ayaa si xun u saameysay hab nololeedka bulshada soomaaliyeed, taas oo si qasab ah iyo si iskood ba kordhisay in dadku ka tagaan deegaannadoodii. Barakacayaasha gudaha iyo qulqulka dadka ka tallaaba xuduudaha ayaa loo sababayn karaa abaaraha soo noqnoqda iyo daadadka. Dadka Soomaaliyeed ayaa u nugul dhibaatooyinkaas is la markaana waxaa liitaa awoodda la-qabsi ee Isbaddelka cimilada.

Saadaasha kor u kaca heerka badda oo ay ugu wacan tahay Isbaddelka cimiladu ayaa la filayaa in ay sii kordhiso barakaca dadka dhulka xeebaha ku nool.

Haddii aan waxba laga qaban, loollanka kheyraadka dabiiciga ah ee sii yaraanaya ayaa kordhin kara isku-dhacyada iyo khilaafaadka bulsho taas oo keeni karta barakac hor leh.

# CUTUBKA 4aad

# MAWDUUCYADA MUHIIMKA AH (CROSS-CUTTING THEMES)

Soomaaliya waxa ay aqoonsan tahay in horumarka dhaqaale ku xidhan yahay deegaanka dabiiciga is la markaana loo baahan yahay in lala-tacaalo Isbaddelka cimilada. Waxaa lagama maarmaan ah in la kobciyo aqoonta bulsho lana xoojiyo hay'addaha dowladda ee ka shaqeeya wax ka qabashada Isbaddelka cimilada. Si loo gaadho ujeeddooyinka Siyaasadeed waxa kale oo loo baahan yahay in la horumariyo cilmi baarista, agabka iyo ururinta macluumaadka ku habboon wax ka qabashada Isbaddelka cimilada. Mawduucyada muhiimka ah waxa ay taabanayaan waax kasta. Waxa ay lagama maarmaan u yihiin hirgelinta Siyaasadda. Mawduucyadaas waa:

1) Kobcinta awoodaha iyo aqoonta
2) Cilmi baaris, Teknoolajiyad iyo Hal Abuur
3) Iskaashi heer Gobol iyo mid Caalam
4) Macluumaad iyo Baahinta Macluumaadka
5) Waxbarasho iyo Wacyi gelinta Dadweynaha
6) Ka qayb qaadashada Isbaddelka Cimilada

## 4.1.Kobcinta Awoodda iyo Aqoonta

Isbaddelka cimilada waa arrin cusub oo keenaysa caqabado hor leh ama aan horey u jirin. Waxa loo baahan yahay in dadka iyo hay'addaha awoodda u leh ay u diyaar garowaan caqabadahaas cusub iyo wax ka qabashadooda. Soomaaliya waxa ay qaaday tallaabooyin lagu xoojinayo awoodda qaran, laakiin wali waxa jirna caqabado hay'adeed iyo mid aqooneed. Marka la eego saameynta ballaaran ee Isbaddelka cimilada, dhisidda awoodda hay'adeed waa in laga qayb galiyaa bulshada rayidka ah, ururada haweenka, dhalinyarada, warbaahinta, ganacsatada iwm.

Si loo xoojiyo hay'addaha iyo awooda shaqaalaha is la markaana si wax ku ool ah wax looga qabto Isbaddelka cimilada ee heer qaran, heer gobol, heer degmo, iyo heer tuulo.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Kor u qaadida ka qeyb galidda daneeyayaasha iyo in Isbaddelka cimilada ay qayb ka noqoto maareynta kheyraadka dabiiciga;
2) Kobcinta aqoonta iyo hay'addaha ku hawlan wax ka qabashada Isbaddelka cimilada;
3) Fududeynta iyo hirgelinta barnaamijyo lagu horumarinayo aqoonta iyo xirfadaha gaarka ah ee ku saabsan Isbaddelka cimilada sida MODELING (nidaamyada lagula socdo Isbaddelka cimilada);
4) Xoojinta kor-joogteynta iyo dib u eegista barnaamijyada kobcinta awooda iyo in la qiimeeyo in sidii loo baahnaa ay u socdaan;
5) Hormarinta teknoolojiyadda iyo adeegsiga farsamooyinka casriga.
6) Xoojinta awooda xarumaha hal-abuurka (innovation centers) ee maxalliga ah.

## 4.2.Cilmi baaris iyo Teknoolajiyadda

Cilmi-baadhista ayaa door muhiim ah ka ciyaari doonta nidaamka yareynta, la qabsiga Isbaddelka cimilada, iyo hawl-galintooda. Soomaaliya waxay u baahan tahay in la maal-galiyo

cilmi-baaris joogta ah iyo horumarka teknoolajiyada si ay wax uga qabato arrimaha hadda jira. Yeelashada cilmi baaris iyo farsamo horumarineed iyo nidaamyo teknoolaji ah ayaa ka caawin doona dalka in uu fahmo, aqoonsado oo saadaaliyo Isbaddelka cimilada iyo in la sameeyo istiraatiijiyado qiimo leh oo wax ku ool ah. Soomaaliya waxay u baahan doontaa in ay siiso tixgalin iyo dadaal badan oo ku saabsan horumarinta cilmi baarista si ay u caawiso go'aaminta saameynta guud ee Isbaddelka cimilada si ay u taageeraan dejinta siyaasadaha, sharciga iyo waxqabadka teknoolajiyada.

Isticmaalka teknoolijiyada joogtada ah ayaa lagama maarmaan u ah helitaanka yareynta kiimikada Kaarbonka iyo u adkaysiga cimilada iyadoo la adeegsanaayo hab oo ku haboon oo gacan ka geysan kara dhiirigelinta awoodda la qabsashada ee xaaladaha cimilado ee ba'an. Waxaa loo baahan yahay in la aqoonsado baahida iyo muhiimada cilmi-baarista iyo teknoolajiyadda iyo in loo baahan yahay maalgelin iyo kobcin aqooneed. Siddoo kale, waan in la taageero jaamacadaha, ururada, hay'addaha iyo xarumaha ku hawlan cilmi-baarista.

Si loo horumariyo cilmi-baarista iyo teknoolojiyadda, siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in kor loo qaado cilmi baarista iyo horumarka (R&D) si wax looga qabto Isbaddelka cimilada is la markaana la horumariyo teknoolojiyadda ku habboon yareynta iyo la-qabsashada Isbaddelka cimilada; ;
2) Waa in la aqoonsado baahida loo qabo horumarinta teknoolojiyada iyo baahiyad aqoonta si wax looga qabto loona maareeyo Isbaddelka cimilada;
3) Waa in lagu dadaalaa fududeynta gudbinta teknoolojiyadda (Technology transfer) iyadoo la qaadayo wixii caqabado ah ee hor istaagi kara wareejinta teknolojiyadda;
4) Waa in la dhiirigeliyaa adeegsiga teknoolajiyadaha aan deegaanka waxyeelo gaadhsiinayn kuwaas oo uu yaryahay qaaca ay hawada ku sii daynayaan;
5) Waa in la taageero jaamacadaha iyo xarumaha cilmi baarista ee ku hawlan cilmi baarista la xiriirta cimilada;
6) Waa in la dhiirigeliyo adeegsiga aqoonta wadaniga ah (indigenous knowledge) iyo hal-abuurka gudaha ee ku aadan Isbaddelka cimilada;
7) Waa in sare loo qaado awoodda daneeyayaasha kala duwan siddii ay uga faa'idaysan lahaayeen hormarka teknoolajiyada;
8) Si kor loogu qaado la qabsiga iyo tallaabooyinka lagu yareynayo saameynta Isbaddelka cimilada, waan in la dhiirrigeliyaa daneeyayaasha kala duwan siddii ay u sameyn la haayeen Cilmi-baaris iyo Horumarin (R&D);

## 4.3.Iskaashiga Caalamka iyo Gobolka

Soomaaliya waxay ka soo baxaysaa colaado daba dheeraaday waxayna u baahan tahay taageero gobol iyo mid caalami ah. Waddanku wuxuu u baahan yahay khubaro loo tababaro oo gacan ka geysata hirgelinta siyaasadaha deegaanka ee dalka iyo waajibaadka caalamiga ah. In kasta oo horumar laga sameeyay kor u qaadista wacyiga bulshada ee ku habboon caqabadaha ka dhasha

Isbaddelka cimilada, weli waxaa jira baahi baahsan oo loo qabo in la kordhiyo wacyi gelinta, lana dhiso awoodda dalka si wax looga qabto raad-reebka daran ee Isbaddelka cimilada.

Waxaa loo baahan yahay in iskaashi dhow lala yeesho waddamada deriska ah. Sidoo kale, Soomaaliya waxay soo dhaweyneysaa taageerada ay ka hesho beesha caalamka si wax looga qabto saameynta Isbaddelka cimilada. Ujeedada ayaa ah in la hubiyo in taageerada caalamiga ah ee maalgelinta cimilada, barnaamijyada iyo mashaariicdu ay u shaqeeyaan si isku mid ah, si loo ilaaliyo xiriirka dhow ee Soomaaliya ay la leedahay deeq-bixiyeyaasha iyo isku-xirnaanta hay'addaha iyo barnaamijyada caalamiga ah.

## 4.4.Maareynta Aqoonta iyo Helitaanka Macluumaadka

Baahida loo qabo cilmi baarista ku saabsan Isbaddelka cimiladu waa mid weyn. Waxaa loo baahan yahay saadaalin wanaagsan oo la xiriirta saameynta Isbaddelka cimilada, saadaalintaas waxaa sal u ah aqoon wax ku ool ah taas oo suurta galinaysa dejinta istiraatajiyadaha iyo qorshayaasha wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada. Si loo dejiyo istiraatajiyadaha la qabsiga iyo yareynta saameynta isbaddelka cimilada waxay ku xirantahay awoodda uu dalku u leeyahay ururinta, falanqaynta, helidda iyo ka faa'iideysiga macluumaadka ku saabsan saameynta Isbaddelka cimilada. Dowladdu waxa ay ogsoon tahay in go'aan qaadashada (decision making) ku haboon isbaddelka cimiladu ay ku tiirsan tahay helitaanka macluumaadka, maareynta iyo isticmaalka macluumaadkaasi.

Istaraatijiyadaha faafinta macluumaadku waxa ay saameyn ku yeeshaan helitaanka macluumaadka. Si kor loogu qaado ka qeyb galka bulshada iyo wacyi gelinta, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay macluumaad sugan oo ku saabsan Isbaddelka cimilada. Waan in a dejiyo istaraatajiyad hagta xog ururinta, keydinta, falanqaynta, ka faa'iideysiga iyo faafinta macluumaadka iyo xogta ku saabsan Isbaddelka cimilada.

Waxaa aad u yar macluumaadka ku saabsan u diyaargarowga saameynta Isbaddelka cimilada sida daadadka iyo abaaraha. Aqoonta iyo wacyigelinta ayaa ah qodobo muhiim u ah u diyaarigarowga, wax ka qabashada iyo ka soo kabashada dhibaatooyinka ka dhasha Isbaddelka cimilada.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la dhiirigeliyaa doodaha, isdhaafsiga, wadaaga iyo wacyi gelinta ku saabsan Isbaddelka cimilada;
2) Waa in la sameeyaa nidaam gacan ka geysanaya kor u qaadista isdhaafsiga iyo wadaagista aqoonta ku aadan maareynta Isbaddelka cimilada.
3) Waa in la sameeyo istiraatajiyad isgaarsiineed oo wax ku ool ah si kor loogu qaado faafinta xog la isku haleyn karo oo lagu kalsoonaan karo iyo natiijooyinka cilmi baarista ee ku saabsan Isbaddelka cimilada, xogtaas oo lala wadaagayo dadweynaha iyo dhammaan daneeyayaasha ay khusayso;
4) Waa in la sameeyo nidaamyo lagu horumarinayo helitaanka macluumaadka Isbaddelka cimilada iyo isgaadhsiinta la adeegsan karo si macluumaadka loogu gudbiyo

daneeyayaasha kala duwan. Isticmaalka internetka, warbaahinta caadiga ah iyo noocyada isgaadhsiineed ee kala duwan waa in si fiican la isugu dhafo loona adeegsadaa;

5) Waa in la dejiyo nidaam hagaya xog ururinta, diiwaan gelinta iyo adeegsiga aqoonta maxalliga ah iyo tan casriga ah ee ku saabsan maareynta Isbaddelka cimilada;
6) Waa in la saameeyo xarumo Isbaddelka cimilada ee heer qaran iyo heer gobol si ay u xaqiijiyaan xogta Isbaddelka cimilada. Xubnaha qayb ka noqonaya xarumuhu waa in ay ka kala yimadaan daneeyayaasha kala duwan kuwaas oo khibrad iyo aqoon u leh arrimaha Isbaddelka cimilada.

## 4.5.Waxbarashada iyo Wacyi gelinta Dadweynaha

Waxbarashada iyo wacyi gelinta dadweynaha ee arrimaha Isbaddelka cimiladu waa istaraatajiyad muhiim ah oo lagu hubinayo ka qeyb qaadashada iyo iskaashiga daneeyayaasha. In si wax ku ool ah wax looga qabto dhibaatooyinka Isbaddelka cimilada, waxaa muhiim ah in wacyi gelin ballaaran la sameeyo. Waxbarshada iyo wacyi gelinta dadweynuhu waxa ay kor u qaadi doonaan wacyiga iyo wadaagida macluumaadka.

Kor u qaadida wacyiga iyo gacan ka geysashada dhisidda awoodda daneeyayaasha iyo geeddi-socodka horumarinta qaranka ee dhammaan heerarka maamul ee Soomaaliya.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in lagu dadaalaa in dhammaan daneeyayaashu ay fahmaan saameynta Isbaddelka cimilada ee Soomaaliya, waxyaabaha sababa isbaddelka cimilada iyo tallaabooyinka suurta galka ah in la qaado;
2) Waa in kor loo qaado ka qeyb galka hay'addaha dowladda iyo ururada bulshada iyo wacyi gelinta ku aadan Isbaddelka cimilada;
3) Waa in arrimaha la xiriira Isbaddelka cimilada lagu dara manhajka waxbarashadda iyadoo lagu dadaalayo siddii loo soo saari lahaa xirfadlayaal aqoon u leh farsamooyinka wax lagaga qaban karo arrimaha ku saabsan Isbaddelka cimilada;
4) Si dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshadu u fahman arrimaha ku saabsan deegaanka iyo Isbaddelka cimilada, waa in wacyi gelinta dadweynaha loo maraa waxbarasho tooska iyo mida dadban;
5) Waa in kor loo qaado fahamka iyo wacyiga arrimaha ku saabsan Isbaddelka cimilada ee dhammaan waaxaha kala duwan ee heer qaran iyo heer dowlad goboleed;
6) Waa in barnaamijyada tababarada iyo waxbarashada ay qayb ka noqdaan haweenku.

## 4.6.Ka qayb qaadashada Isbaddelka Cimilada

Deegaanku waa aasaaska dhismaha qaranka iyo horumarka dhaqaale ee dalka. Sidaas darteed, si loo gaadho ujeedooyinka Siyaasadda, waa in arrimaha deegaanka iyo Isbaddelka cimilada la xoojiyo laguna daro dhamaan qorshayaasha iyo hawlaha qaranka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la qeexo ama la dejiyo hanaanka arrimaha isbeddelada cimilada loogu darayo qorsheyaasha Federaalka iyo Maamul Goboleedyada;
2) Waa in Isbaddelka cimilada uu qayb ka yahay siyaasadaha iyo qorshayaasha horumarineed ee heerarka kala duwan ee dowladda: Federaalka, Maamul Goboleed, Gobol, Degmo, iyo Tuulo;
3) Waa in la dhiso qaab-dhismeedka hay’addaha lana kobciyaa awooddooda isku xidh iyadoo la xoojinayo wax ka qabashada Isbaddelka cimilada.
4) Si wax looga qabto baahiyaha dadka jilicsan, waa in arrimaha la xiriira Isbaddelka cimilada lagu daraa siyaasadaha dhaqaale iyo qorshayaasha waxqabad ee ku aadan baahiyaha dadka jilicsan;

## CUTUBKA 5aad
## WAAXYAHA AHMIYADDA GAARKA AH LEH

Isbaddelka cimiladu wuxuu saameyn weyn ku yeelan doonaa waaxyaha muhiimka ah ee dhaqaalaha Soomaaliya. Waxaa la saadaalinayaa in isbeddelada cimiladu saameyn ku yeelan doono: Beeraha, Xoolaha, Biyaha, Kheyraadka Badda, Dhirta iyo Noolaha kala duwan, Kaabayaasha dhaqaale iyo Magaalooyinka. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay siyaasad lagu xoojinayo awoodda la qabsiga ee ku aadan Isbaddelka cimilada ee dhammaan waaxyahan muhiimka ah.

### 5.1.U adkaysiga iyo La-Qabsiga Isbaddelka Cimilida

La qabsiga Isbaddelka cimilada ayaa muhiimad weyn u leh Soomaaliya iyo waddamada kale ee ay la soo deristay saameynta Isbaddelka cimiladu. Qaaca (GHG) Soomaaliya ay hawada ku sii dayso waa mid aad u yar. Laakiin raad-reebka Isbaddelka cimilada sida abaaraha iyo daadadka ayaa sanadihii u dambeeyay saameyn weyn ku yeeshay waddanka. Sidaas darteed, waa lagama maarmaan dardar galinta la-qabsiga Isbaddelka cimilada.

In kastoo awoodda la-qabsiga ee Soomaaliya ay tahay mid hooseysa ama daciifa ah, dalku waxa uu hirgelinayaa siyaasadaha soo socda ee ku aadan waaxyaha ilaha dhaqaalaha muhiimka ah ee dhaqaalaha waddanka.

#### 5.1.1. Beeraha

Wax soo saarka beeruhu waxa ay ka mid yihiin waaxyaha ugu nugul Isbaddelka cimilada. Taasi waxaa sabab u ah, beeruhu waxa ay ku tiirsan yihiin roobka. Marka la eego xaddiga uu leeg yahay dhaqaalaha ka soo baxa beeraha, wuxuu kaga jiraa wax soo saarka dalaggu kaalinta labaad (2) kan kowaadna (1) waa xoolaha (NDP-9).

Beeraleyda Soomaaliyeed ayaa ku tiirsan beeraha roobka taasoo ka dhigeysa inay aad ugu nugul yihiin Isbaddelka cimilada iyo saameynteeda. Si loo gaadho la-qabsi wax ku ool ah, waxaa muhiim ah in la fahmo nuglaanta waaxda beeraha.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la bilaabo isla markaana kor loo qaado howlaha cilmi baarista iyo farsamooyinka casriga ah ee wax soo saarka beeraha casrigaa (Smart agriculture);
2) Waa in la dhiirigeliyo lana kobciyo awoodda beeralayda iyadoo kor loo qaadayo wacyiga ama ka war qabka arrimaha Isbaddelka cimilada;
3) Waa in la horumariyaa abuurka wanaagsan iyo noocyada dalagga ee u adkeysan kara cimilada isbadeshay ama isbedelaysa;
4) Si loo yareeyo khatarta loona kordhiyo awoodda beeraleyda si ay ula tacaalaan abaaraha iyo daadadka, waa in la horumariyaa isticmaalka kala duwan ee dhulka (diversified land use practices), sida isku dhafidda beeraha iyo xoolaha, khudaarta, shinnida, digaagga iwm;
5) Waa in la horumariyo tiknoolojiyadda waraabka casrigaa, dib-u-isticmaalka biyaha (water recycling) iyo keydinta biyaha roobka, iwm;

6) Waa in la sameeyo lana horumariyo waraabka dhibicda (drip irrigation) iyo sidoo kale farsamooyinka kale ee yareeya isticmaalka biyaha kuwaas oo yareyn doona qadarka/xadiga biyaha loo baahan yahay in loo isticmaalo waraabka;
7) Waa in la horumariyaa waraabka beeraha iyo biyaha iyadoo la qiimeynayo baahida biyo ee jirta marka la fiiriyo isbedelada cimilada;
8) Waa in kor loo qaadaa isticmaalka bacriminta dabiiciga ah (organic) lana yareeyaa isticmaalka bacriminta kiimikada;
9) Si loo yareeyo khasaaraha ka dhasha Isbaddelka cimilada sida abaar ama daadad burburiya dalagga, waa in la sameeyo nidaamka ceymiska beeraha;
10) Waa in la hagaajiyaa awoodda keydinta dalagga iyo farsamayntooda (post-harvest capacity).
11) Waa in la kobciyaa ama la dhisaa awoodda dib u warshadaynta iyo farsamaynta qashinka beeraha;
12) Waa in la sameeyaa falanqeyn dhameystiran (comprehensive analysis) si loo fahamo caqabadaha jira ee la xiriira la-qabsashada Isbaddelka cimilada, sida aqoonta iyo dhaqaalaha;
13) Si kor loogu qaado u diyaargarowga beeralayda is la markaana la saadaaliyo jawiga soo socda sida abaaraha, daadadka, cudurada, cayayaanka beeraha iwm, waa in la sameeyo lana xoojiyo nidaamyada digniinta.

### 5.1.2. Xoolaha

Xooluhu waa laf-dhabarta dhaqaalaha Soomaaliya, marka la eego wax soo saarka guud ee dalka (GDP) iyo lacagta adag ee ka soo xeroota. Xooluhu waa hantida, hidaha dhaqan ee reer guuraaga iyo sharafta bulshada Soomaaliyeed. Dakhliga waddanka ka soo gala dhoofinta alaabooyinka iyo kheyraadka, 75% waxa laga helaa xoolaha.
Inta badan dadka Soomaaliyeed waxay ku tiirsan yihiin xoolaha iyo wax soo saarkooda.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la casriyeeyaa nidaamyada dhaqashada xoolaha si loo dhiso u adkeysiga Isbaddelka cimilada;
2) Waa in la kobciyo awoodda xoolo dhaqatada. Waxaa loo baahan yahay in kor loo qaado wacyiga xoolo dhaqatada si ay u fahmaan dhibaatooyinka ka iman kara Isbaddelka cimilada iyo la tacaaliddeeda;
3) Waa in la xoojiyaa nidaamyada maareynta xoolaha. Waa in la sameeyaa farsamooyin la-qabsi si ay uga faa'idaystaan reer miyiga aan awoodin inay helaan ama iibsadaan tikniyoolajiyaddaha la-qabsashada ee qaaliga ah;
4) Waa in la abuuraa lana xoojiyaa noocyada xoolaha maxalliga ah (local breeds) ee ku habboon cimilada deegaanka Soomaaliyeed;
5) Waa in la xoojiyaa hidde-sidaha maxalliga ah (local genetics) iyadoo lagu dhafayo taranka (cross-breeding) xoolaha u adkeysan kara kuleylka iyo cudurrada;

6) Si loo gaadho la-qabsi waara wakhtiga fog, waa in kor loo qaadaa fahanka ku saabsan saameynta Isbaddelka cimiladu ku leedahay xoolaha, iyadoo la horumarinayo caafimaadka xoolaha, biyaha iyo maareynta;
7) Waa in la sameeyaa lana horumariyaa nidaamyada digniinta ee masiibooyinka dhici kara si looga gaashaanto;
8) Waa in la xoojiyaa xakameynta cudurada xoolaha iyo horumarinta caafimaadka xoolaha;
9) Waa in la abuuraa calafka xoolaha oo u adkaysan kara abaarta iyo kuleylka;
10) Waa in la xoojiyaa qaab dhismeedka hay'addaha waaxda xoolaha si ay u maareeyaan abaaraha.

### 5.1.3. Kheyraadka Biyaha

Raad reebka Isbaddelka cimilada waxa si cad looga arkaa saameynta ay ku yeelatay helitaanka biyaha tiro iyo tayo leh. Biyo yaraan ayaa ka jirta qaybo badan oo ka mid ah Soomaaliya. Waxaana xaaladda sii xumeeyay isbaddelka cimilada.

La-qabsi wax ku ool ah si loo gaadho, waxa loo baahan yahay in maalgelin lagu sameeyo waaxda biyaha is la markaana la dejiyo Qorshayaal iyo Siyaasad hagta.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Si loo sugo helitaanka biyo nadiif ah oo joogto ah, waa in la ilaaliyo ilaha biyaha la cabo.
2) Si loo helo biyo joogta ah, waa in la horumariyaa farsamooyinka dib u warshadeynta iyo dib u adeegsiga biyaha;
3) Waa in ahmiyad la siiyaa kaabayaasha biyaha ee bulshada sida berkadaha, ceelasha, haraha iyo balliyadda;
4) Waa in la ururiyaa xogta iyo macluumaadka la xiriira ilaha biyaha dhulka dushiisa iyo hoostiisa ah si loo hubiyo tayada iyo helitaanka biyo nadiif ah.
5) Waa in la sameeyo daraasad dhameystiran oo ku saabsan biyaha Soomaaliya si loo fahmo heerka nuglaanta lana qaado tallaabooyinka ku haboon ee la qabsiga;
6) Waa in wakhtiyo cayiman dib u eegis lagu sameeyo siyaasada biyaha iyo siyaasaddaha kale ee la xiriira biyaha ee hada jira (sida beeraha, tamarta, deegaanka) si loo hubiyo inay si ku filan wax uga qabtaan caqabadaha la xiriira Isbaddelka cimilada;
7) Waa in la sameeyaa Qorshaha Qaranka ee Maareynta Kheyraadka Biyaha, kaas oo si cad u tixgelinaya Isbaddelka cimilada;
8) Waa in la hubiyaa in Isbaddelka cimilada lagu daro naqshadeynta/dejinta (design) kaabayaasha biyaha;
9) Waa in la hubiyaa helitaanka biyaha ee xoolaha, duurjoogta iyo guud ahaan deegaanka iyadoo la tixgelinayo cimilada isbeddeshay;
10) Waa in la xoojiyo keydinta biyaha roobka, si loogu isticmaalo guryaha, xoolaha, beeraha iyo warshadaha;
11) Waa in la xoojiyo xiriirka iyo wada shaqeynta wadamada deriska ee ku aadan biyaha;

12) Waa in la xoojinyaa adeegsiga Sayniska Macluumaadka Dhulka (Geoinformation Science - GIS) iyo Teknoolojiyada la socodka dhulka (Earth Observation Technologies) si loo qiimeeyo kheyraadka biyaha;
13) Waa in la sameeyaa lana horumaryaa nidaam lagu la soconayo oo lagu xakameynayo daadadka iyo abaarta.

### 5.1.4. Kheyraadka Badda

Soomaaliya waa dalka ugu xeebta dheer qaaradda Afrika (3,333 km). Dalku waxa uu leeyahay Aag Dhaqaale oo weyn (Exclusive Economic Zone), kaas oo lagu qiyaaso 825,052 kiiloomitir laba jibaaran (sq km), waana aag qani ku ah kalluumaysiga (NDP-9).

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la sameeyaa lana xoojiyaa nidaamka digniinta iyo saadaalinta cimilada halista ah;
2) Marka la eego duufaannada soo noq noqonaya waxaa loo baahan yahay maalgelin iyo dhisidda dekado aamaan ah iyo in la qaado tallaabooyin lagu hagaajinayo badbaadada badda;
3) Waa in la kobciyaa awooda bulshada rayidka ah, ururada aan dowliga ahayn, iyo hay'addaha dowladda ee ku saabsan qorshayaasha Isbaddelka cimilada. Wada shaqeynta hay'addaha dowladda, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah waxay muhiim u tahay la qabsiga Isbaddelka cimilada;
4) Waa in la dejiyaa lana hirgaeliyaa barnaamijyo ku saabsan maareynta kalluumeysiga iyo xakameynta cudurada ka dhasha isbaddelka cimilada;
5) Si ay bulshooyinka xeebaha iskaga difaacaan duufaanada iyo nabaad-guurka xeebaha (coastal erosion), waa in kor loo qaado wacyiga bulshada ee ku saabsan masiibooyinka xeebaha iyo tallaabooyinka lagama maarmaanka ah; abuurida iyo dib-u-soo-nooleynta dhirta lagu yaraynayo hirarka iyo fatahaadaha xeebaha.
6) Waa in kor loo qaado abuurista iyo dib u soo nooleynta doogga iyo keymaha xeebta;
7) Waa in la horumariyaa dhirta iyo dalagga ku bixi kara ama u adkaysan kara biyaha dhanaan/biyaha milixda leh.

### 5.1.5. Keymaha, Duurjoogta iyo Noolaha kala duwan

Burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya ka hor, kheyraadka dhirtu waxay dakhliga dalka ku biirinaayeen 2.5% (GDP). Dhanka kale, bulsho badan ayay noloshoodu ku tiirsanayd kheyraadka dhirta. Sannadkii 1985 Soomaaliya waxay ahayd isha adduunka ugu weyn ee Faleenka iyo Xabkaha, waxayna soo saartay wax ka badan 2,000 tan (IUCN, 2006). Sidoo kale, Soomaaliya waxa ay ahayd xarunta duurjoogta iyo dhir fara badan oo kala jaad ah. Isbaddelka cimilada ayaa saameyn ba'an ku yeelatay keymaha iyo noolaha kala duwan ee waddanka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Ilaalinta iyo kor u qaadida kheyraadka dhirta ku waas oo qeyb ka qaata in ay hawada ka saaraan qaaca hawada wasakheeya;

2) Xoojinta barnaamijyo dhir beeris iyadoo la dhiiri gelinayo beerista noocyada dhirta u adkaysata abaarta iyo kuleylka;
3) Xoojinta awoodda cilmi baarista ee ku aadan dhirta si kor loogu qaado dadaallada wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada iyada oo la kobciyo aqoonta gaarka ah ee dhirta iyo Isbaddelka cimilada;
4) Ilaalinta iyo dib u soo nooleynta dhirta iyo duurjoogta ku dhaw in ay dabargo'aan iyadoo lagu dadaalayo siddii ay ula qabsan la haayeen Isbaddelka cimilada;
5) Xoojinta iyo hirgelinta mashaariicda baratakoolada/heshiiska ku saabsan sidii loo yareyn lahaa Nabaad guurka iyo xaalufinta dhirta;
6) Dhaqan gelinta tallaabooyinka lagu dhimayo xaalufinta dhirta iyo Nabaad guurka;
7) Taageeridda cilmi baarista si kor loogu qaado fahamka saameynta Isbaddelka cimilada ee ku wajahan duurjoogta iyo maareynta qorshayaasha la-qabsiga;
8) La socodka (kor joogtayn), yareynta iyo xakameynta ku aadan noocyada dhirta aan maxaliga ahayn ama qalaad (invasive species);
9) Xoojinta adeegsiga Sayniska dhulka (Geoinformation Science - GIS) iyo Tiknolojiyadda La Socodka Dhulka (Earth Observation Technologies) si loo qiimeeyo xaaladaha dhirta iyo noolaha kala duwan.

### 5.1.6. Kaabayaasha Dhaqaale

Kaabayaashu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan dhisidda u adkeysiga Isbaddelka cimilada. Intii colaaduhu socdeen, waxaa burburay kaabayaashii dhaqaale ee Soomaaliya. Haatan waddanku waxa uu qaaday tallaabooyin dib loogu dhisayo kaabayaasha dhaqaale ee dalka. Isbaddelka cimilada ayaa saameyn ku leh kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, biyo-xireenada, xadhkaha korantada, guryaha iyo deegaanka. Kaabayaasha xeebuhu waxa ay sidoo kale u baahan yihiin in wax laga qabto sida dhisidda darbiyada difaaca xeebaha si loo yareeyo u nuglaanta sare u kaca badda.

Daadadka, abaaraha, dilaaca dhulka, iyo khataraha kale ee cimiladu waxa ay saameyn toos ah ku yeelan karaan kaabayaasha dhaqaale. In kasta oo maalgelinta hore ee lagu dhisayo kaabayaasha dhaqaale ay tahay mid qaali ah, laakiin kaabayaasha dhaqaale ee tayadoodu sareyso waxa ay u adkaysan karaan saameynta Isbaddelka cimilada oo faa'idada maaliyadeed ee kaabayaashaasi waa mid jiraysa muddo fog/dheer. Sidaas darteed, waxaa lama huraan ah in la tixgaliyo arrimaha Isbaddelka cimilada marka la dejinayo naqshadda (design) kaabayaasha dhaqaale.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la sameeyo kaabayaal gaadiid oo waara (sida waddooyinka) waxyeelo na aan u gaysanayn deegaanka;
2) Kobcinta aqoonta farsamo ee shaqaalaha si ay ugu daraan arrimaha ku saabsan saameynta Isbaddelka cimilada marka la dejinayo qorshayaasha dhismaha kaabayaasha;
3) In la sameeyo daraasaad ku saabsan heerka tayada naqshadaha (design standards) kaabayaasha munaasibka ah ee u adkaysan kara halista cimilada ba'an ee dabiiciga ah;

4) Waa in la hubiyaa adkeysiga kaabayaasha ee ku aaddan cimilada iyadoo la isticmaalayo macluumaadka iyo daraasadaha ku saabsan cimilada marka la qorsheynayo kaabayaasha si loo ogaado loona farsameeyo agabyada kor u qaadaya adkeysiga kaabayaasha;
5) Waa in la sameeyaa qiimeyn ku saabsan halista ka dhalan karta Isbaddelka cimilada marka la qorsheynayo mashaariicda waa weyn ee kaabayaasha dhaqaalaha sida wadooyinka, garoomada diyaaradaha iyo dekedaha;

### 5.1.7. Magaalooyinka

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay waddamada magaalooyinku aadka u koroyaan bulsho iyo baaxad ahaan. Ku dhawaad muddo soddon sanadood ah, muuqaalka magaalooyinka dalka ayaa ahaa kuwo aan si nidaamsan loo dejin. Magaalooyinka waa weyn & kuwa dhexe waxaa ka buuxa dhismayaal is wada daba yaal oo aan la qorsheyn iyo dhismayaal ku yaal meelo halis ah. Awoodda hay'addaha dowladda ayaa ah mid xadidan oo inta badan ma awooddaan in ay hagaan ama xakameeyaan geedi-socodka magaalooyinka (ama halka ay dadku degayaan) (UN HABITAT, n.d).

Dhanka kale, dadka reer miyiga ah ayaa wali u soo hayaamaya magaalooyinka, iyagoo culeys saaraya adeegyada iyo kaabayaasha dhaqaale ee magaalooyinka. Tusaale ahaa intii ay socotay abaartii 2017, waxaa la qiyaasaa in ka badan 680,000 qof ay barakaceen is la markaana badidood (badankood) ay u guureen magaalooyinka (Bangiga Adduunka, 2017). Nuglaanta dadka magaalooyinka, gaar ahaan dadka saboolka ayaa korodhay sababo la xiriira culeyska ay sababeen dadka magaalooyinka soo galaya. Waxaa kordhay loolanka loogu jiro adeegyada iyo kheyraadka yar (aan badnayn) ee magaalooyinka.

Magaalooyinku waxay u baahan yihiin inay la tacaalaan culeyska ka dhashay ama ka dhasha abaaraha, daadadka iyo amni darada. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in la helo magaalooyin habaysan/nidaamsan (well-structured urban) oo la jaan qaadi kara (la-qabsan kara) dhibaatooyinka ka dhasha Isbaddelka cimilada.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in hay'addaha dowladdu (dowladaha hoose) dejiyaa naqshado degsiimooyin (settlements) oo tixgelinaya Isbaddelka cimilada;
2) Waa in la helo jawi siyaasadeed oo dhigaya in lagu daro arrimaha Isbaddelka cimilada qorsheynta iyo maareynta magaalooyinka iyo dhismayaasha;
3) Waa in la sameeyo qiimeyn ku saabsan halista (hazard mapping) iyo siddii loo yareyn lahaa iyadoo la qiimeynayo deegaamaynta magaalooyinka u nugul daadadka iyo khataraha kale ee cimilada;
4) Waa in la dardar galiyo barnaamijyada horumarinta aadanaha ee loogu talo galay kor u qaaddida adkeysiga, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo dadka liita iyo kuwa nugul is la markaana wax laga qabanayo degsiimooyinka aan rasmiga ahayn (informal settlements) iyo xaaladaha nolosha ee dadka goobahaas deggan;

5) Waa in la dhiiri geliyo siddii ay dhismayaasha ganacsi iyo kuwa dadweynuhu u isticmaali lahaayeen aaladaha isticmaalka tamartoodu yar tahay;
6) Waa in la horumariyo helintaanka biyaha ee magaalooyinka iyo nidaamyada maareynta qashinka iyadoo la sameynayo warshadaha qashinka farsameeya (recycling facilities) iyo qashin-qubyo, is la markaana waa in kaarboonka METHANE loo beddelaa ama laga dhaliyaa koronto;
7) Waa in la sameeyaa warshadaha farsameeya biyaha wasakhda ah (biyaha bullaacadaha). Si dib loogu farsameeyo, waa in qashinka loo kala saaraa noocya kala duwan, taasina waxaa masuul ka ah goobaha ay qashinku ka yimaadaan sida xaafadaha iyo goobaha ganacsiga;
8) Waa in lala socdaa xaaladda dadka ka soo guuraya miyiga ee magaalooyinka soo degaya lana horumariyaa adeegga iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Si loo yareeyo dadka miyiga ka soo guuraya, waa in la taageeraa magaalooyinka yar yar ee noloshoodu ku tiirsan tahay beeraha & xoolaha;
9) Waa in la dejiyaa lana hirgaliyaa "Qorshaha Isticmaalka Dhulka" iyadoo la tixgelinayo Isbaddelka cimilada ee haatan iyo saadaasha mustaqbalka;
10) Waa in la maareeyaa goobaha warshadaha ee magaalooyinka iyadoo la adeegsanayo Qorshaha Isticmaalka Dhulka.

### 5.2.U diyaargarowga Masiibooyinka & Wax ka qabashadooda

Soomaaliya waxaa soo food-saaray khataro sii badanaya oo la xiriira Isbaddelka cimilada sida daadadka, abaaraha, dabaylaha/dufaanno. Isbaddelka cimiladu wuxuu sii xoojinayaa khataraha masiibooyinka taas oo horseedi karta khasaare nafeed iyo mid maal. Istaraatajiyadda maareynta masiibooyinku waxa ay kor u qaadaysaa adkeysiga bulshada iyadoo yareyneysa halista soo gaadhi karta mustaqbalka dadka iyo duunyada. Tallaabooyinka wax ku ool ka ah ee maareynta masiibooyinku waxa ay bulshada ka ilaaliyaan khasaaraha la xiriira saameynta fatahaadaha, abaaraha, duufaanta iwm.

Sidoo kale, tallaabooyinkaasi waxa ay kobciyaan awoodda bulshada ee la-qabsiga iyo u adkaysiga masiibooyinka sida cudurada faafa ee ka dhashay cimilada isbedeshay iyo in aan lagu dagaalamin kheyraadka dabiiciga ah oo si wada jir iyo nabad ah looga wada faa'idaysto.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la aasaaso Hay'adda Qaran ee Saadaasha Hawada si ay u bixiso digniinta hore (early warning) ee xaaladaha ba'an ee cimilada is la markaana loo yareeyo khataraha ka dhalan kara;
2) In la xoojiyo la socodka iyo saadaasha hawada si loo helo macluumaad wax ku ool ah taasi oo sahli doonta in digniin laga bixiyo masiibooyinka soo socda ama dalka ku soo fool leh.
3) Waa in la kobciyo awooda hay'addaha ku hawlan maareynta iyo u diyaargarowga masiibooyinka. Waa in kor loo qaado wacyiga is la markaana la siiyaa tababaro xirfadeed si loo hubiyo u diyaarsanaanta masiibooyinka iyo wax ka qabashadooda;

4) Waa in la xoojiyo awooda farsamo iyo qalab ee gurmadka/taakulada degdega ee masiibooyinka;
5) Waa in la xoojiyo wada-shaqeynta ka dhaxeysa dowladda iyo hay'addaha aan dowliga ahayn si ay uga jawaabaan waxna uga qabtaan xaaladaha degdega ah.
6) Si hoos loogu dhigo fatahaada webiyada, waa in la dhiso nidaam bullaacado, biyo qabatin, aaga difaaca fatahaadaha (buffer zone) iyo in dhir beeris lagu sameeyo webiga hareerihiisa;
7) Waa in la dhiso kanaallo, keyd biyo iyo biyo-xireenno si loo xakameeyo daadadka loona keydiyo biyaha is loo isticmaalo/looga faa'idaysto xilliga jiilaalka ama abaaraha;
8) Waa in la dhiirrigeliyo siddii dadka degan aagga iyo meelaha u nugul aafooyinka Isbaddelka cimilada ay uga guuri lahaayeen loona dejin lahaa meelo kale;

## 5.3.Hoos u dhigid/Yareyn (Mitigation)

Waddanku waxa uu xooga saarayaa la qabsiga Isbaddelka cimilada. Laakiin taasi macnaheedu maaha, in yareynta kaarboonku aanay muhiim ahayn. Kaarboonka ay Soomaaliya hawada ku sii dayso waa mid aad u yar (62.92 Mt $CO_2$ sanadkii 2015). Taasi oo u dhiganta wax ka yar 0.12% wadarta guud ee kaarboonka adduunka sannadkii 2015. Kaaboonka ugu badan (96%) waxa kuu ka yimid Beeraha, Dhirta iyo Isticmaalka Dhulka, halka Tamarta iyo Qashinka ay ahaayeen 3% iyo 1% sidaay u kala horreeyaan. Waaxda warshadaha dalku, xadi kaarboon oo la diiwaan geliyay hawada kuma sii dayn maadaama aanu dalku lahayn warshado badan (INC, 2018).

Soomaaliya waa xubin lifaaqa I (Annex I) ee UNFCCC, taasi oo macnaheedu tahay, Soomaaliya waajib kuma aha in ay yareyso kaarboonka ay hawada ku sii dayso. Saddexda gaas ee ugu badan (gaasaska GHG) ee hawada dalka lagu sii daayo waa: carbon dioxide ($CO_2$), methane ($CH_4$), iyo nitrous oxide ($N_2O$). Qeybtani waxa ay sharraxaysaa siyaasadda dalka ee ku aadan yareynta ama hoos u dhigidda Kaarboonka hawada wasakheeya ee Soomaaliya.

### 5.3.1. Tamarta

Qaaca hawada wasakheeya ee kasoo baxa waaxda tamarta ee Soomaaliya waxay salka ku hayaan isticmaalka shiidaalka loo isticmaalo in laga dhaliyo korontada iyo tamarta gaadiidka, wax soo saarka, dhismayaasha, meelaha deegaameeyay iyo hay'addaha isticmaala tamarta. Raad-raaca soo saarista neefaha wasakheeya hawada ee Soomaaliya waxay la mid tahay kuwa wadamada soo koraya. Kaarboonka ($CO_2$) iyo methane ($CH_4$) waa kuwa ugu badan ee ka qayb qaata qiiqa dikhawga hawada Soomaaliya, iyadoo lagu kala qiyaaso 49% iyo 44% sidey u kala horeeyaan sanadkii 2015. Xaddiga ugu badan ee qiiqa $CO_2$ waxuu ka yimaadaa isticmaalka shiidaalka kaasoo loo isticmaalaayo gaadiidka iyo dhismayaasha halka badanaa Methane uu ka dhasho ka faa'iideysiga kheyraadka tamarta ka timaada noolaha. Qiiqa Nitrous oxide ($N_2O$) waxa uu ka dhashaa qiiqa baabuurta iyo isticmaalka shidaalka kale iyadoo lagu qiyaasay xadi dhan 7% qiiqa hawada Somaliya sannadkii 2015kii.

Si loo yareeyo qiiqa, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay inay sare u qaaddo ama kobciso hufnaanta tamarta iyo isticmaalka ila tamareedyo kale.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) In la dhiirrigeliyo tamarta dib isku cusbooneysiisa iyo adeegsiga teknoolojiyada yareysa isticmaalka tamarta iyadoo arrimahaas laga dhaqan gelinayo dhammaan waaxyaha dhaqan-dhaqaale ee dalka;
2) Waa in la abuuro lana horumariyo nidaamka gaadiidka dadweynaha (public transport system) iyadoo la tixgelinayo gaadiidka kaarboonkiisu yar yahay (GHG);
3) Si loo helo gaadiid hufan, waa in la horumariyo kaabayaasha dhaqaale sida wadooyinka iyo tareennada;
4) Waa in la dhiirigeliyo cilmi-baarista, horumarka iyo teknoolojiyadda cagaaran;
5) Waa in la xoojiyo siddii loo heli lahaa shidaal iyo tamar nadiif ah oo qiimo jaban;
6) Waa in la horumariyo la socodka, warbixinta iyo xaqiijinta ku saabsan kaarboonka hawada lagu sii daayay ee waaxda tamarta iyadoo la raacayo hababka habboon ee lagu xisaabiyo kaarboonka;
7) Waa in la sameeyo oo si joogto ah loo cusbooneysiiyo xogta ku saabsan kaarboonka hawada lagu sii daayay iyo xaddiga laga saaray ama laga nuugay;
8) Waa in la sameeyo kor joogteyn, warbixin iyo xaqiijin (MRV) iyadoo lala soconayo xaddiga GHG ee hawada lagu sii daayay ama laga nuugay in uu waafaqsan yahay shuruudaha NDCs sannad ka hor warbixinta adduunka;

### 5.3.2. Beeraha

Macnaha erayga beero waxaa loo isticmaalay si balaaran oo waxaa ka mid ah dalagga, xoolaha iyo kalluumeysiga. Hawlaha beeraha waxaa ka mid ah: maareynta dhul-beereedka, daaqa, maareynta carrada dabiiciga ah ee beeraha, dib u soo celinta dhulka waxyeeladu soo gaadhay (degraded land), maareynta xoolaha iyo digada (manure). Ficiladaas oo dhami waxa ay hawada ku sii daayaa qiiq ama kaarboon hawada wasakheeya. Kaarboonka ugu badan ee ay waaxdani hawada ku sii dayso waa Methane ($CH_4$), kaas oo badanaa ka dhasha dheef-shiidka xoolaha (digada). Soomaaliya waxay caan ku tahay xoolaha oo waxaa ku nool tiro malaayiin ah – 55.7 milyan (FAO/FSNAU-MoLFR, 2019). Kaarboonka ugu badan ee waaxda beeruhu waxa uu ka yimaadaa qeybta xoolaha. Ilaha ugu weyn ee wasakhda hawada ee qaybtan ka soo baxa waa: dheef shiidka xoolaha oo siidaaya methane (enteric fermentation) iyo qashinka xoolaha.

Waaxda beeraha waxaa ku tiirsan dad badan oo sidoo kale waxa ay muhiim u tahay isku filnaanshaha cuntada ee qaranka. Dhaqaalaha Soomaaliya ayaa si weyn ugu tiirsan waaxdan. Si loo yareeyo saameynta (raad-reebka) waaxdan ee deegaanka is la markaana hoos loogu dhigo kaarboonka hawada lagu sii daynayo, siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) In la xoojiyo lana hagaajiyo nidaamka maareynta qashinka beeraha;
2) Waa in la horumariyo maareynta quudinta (soo saarida calafka) xoolaha;
3) Waa in si fiican loo maareeyo digada xoolaha (ururinta, keydinta, burburinta);
4) Waa in la maareeyo nidaamka daaqa xoolaha;

5) Waa in la taageero lana dhiirigeliyo beeraleyda iyadoo la siinayo qalab, tababar ku saabsan maareynta bacrinta carrada, maareynta cayayaanka iyo soo saarista bacriminta dabiiciga ah;
6) Waa in la isticmaalo matoorada biyaha ee qoraxda iyo dabeysha ku shaqeeya kuwaas oo loo adeegsanayo waraabinta beeraha iyo xoolaha;
7) Waa in la qaado tallaabooyin lana dejiyo siyaasado dib loogu soo noolaynayo dhulka waxyeeloobay (degraded land) iyadoo loo diyaarinayo dhulkaasi in uu noqdo dhul beereed. Taasi waxa ay yareyn dhulka keymaha ama dhirta laga jarayo si loogu badelo dhul-beereed, keymuhu waxa ay muhiim u yihiin hoos u dhigida qaaca;
8) Waa in lagu dadaalaa siddii hoos loogu dhigi lahaa kaarboonka ka soo baxa Waaxda Beeraha is la markaana kor loo qaadaa kaalinta waaxda ee yareynta qiiqa hawada wasakheeya;
9) Waa in si joogto ah loo dayac tiraa doomaha kalluumeysiga lana dhiirigeliyaa siddii ay u adeegsan la haayeen matoorada aan shidaal badan cunin/isticmaalin ama shidaalka nadiif ah ku shaqeeya;

### 5.3.3. Isticmaalka Dhulka iyo Keymaha

Noocyada isticmaalka dhulka ee Soomaaliya waa: dhul-beereed, dhul-daaqsiimeed, keymo iyo dhul-deegaan (miyi iyo magaalooyinka). Keymaha iyo guud ahaan dhirtu waxa ay aad muhiim ugu yihiin hoos u dhigida kaarboonka GHG iyagoo hawada ka saara unugyada qiiqa ee hawada lagu sii daayo (qashinka kaarboonka). Sidaas darteed, dhulka keymuhu waxa ay muhiimad gaar ah u leeyihiin deegaanka guud ahaan iyo yareynta Isbaddelka cimilada. Xaalufinta dhirta iyo in loo badelo dhulka keymaha hawlo kale (isticmaal kale) waxa ay kordhisaa wasakhda hawada. Waxaa jirta baahi loo qabo dhul-beereed cusub iyo ballaarinta magaalooyinka (magaalooyinka oo fidaya).

Dowladdu waa inay joojiso ama yareeyso dhulka-dhirta iyo keymaha ee loo badelayo isticmaalka kale. Siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la yareeyo qiiqa (kaarboonka) ka dhasha gubidda/shidida keymaha/dhirta. Siddoo kale waa in la yareeyo bedelidda isticmaalka dhulka;
2) Waa in la horumariyo maareynta keymaha iyadoo la xoojinayo maamulka iyo hay'addaha ku hawlan maareynta keymaha (oo ay ku jiraan duurjoogta);
3) Si loo yareeyo kaarboonka, nabaad guurka, xaalufinta dhirta, burburinta dhulka iyo dabargo'a duurjoogta, waa in la xoojiyo awoodda qaran ee xakameynta dhuxusha iyadoo la dhaqan gelinayo Siyaasada Qaran ee Dhuxusha;
4) Si loo yareeyo qaaca, waa in la sameeyaa dhul-daaqsimeed (ama seerayaal) iyo dhul ay dhirtu ka baxdo;
5) Waa in dhiirigelin iyo taageero la siiyo wax qabadka la xiriira yareynta xaalufinta dhirta iyo badelka isticmaalka dhulka;

6) Waa in la hormariyo guud ahaan howlaha REDD + iyo dhulka keymaha ah ee Soomaaliya;
7) Waa in la sameeyo diiwaan qaran iyo nidaam xisaabin oo qeexaya ama kala caddeynaya arrimaha xuquuqda kaarboonka, lahaanshaha iyo mudada (duration);
8) Waa in kor loo qaado howlaha yareeya kaarboonka, sida dib-u-dhireynta, dhir-beerista iyo beero-dhireed (Agro-forestry) ku baahsan dalka oo dhan, kuwaas oo sidoo kale keenaya faa'iidooyin lagu yareynayo walaaca iyo cadaadiska (culeyska lagu hayo) keymaha dabiiciga iyo deegaanka;
9) Waa in si joogteysan/waara looga faa'idaystaa keymaha iyo duurjoogta kuwaas oo qayb ka ah hab-nololeedka bulshada miyiga iyo siddii ay ula qabsan lahaayeen Isbaddelka cimilada, iyo siddoo kale inay gacan ka gaystaan yareynta qaaca.

### 5.3.4. Warshadaha

Markii ay burburtay dowladdii dhexe ee dalka (wixii ka dambeeyay 1991), warshadihii waddanka waa la bililiqaystay oo la burburiyey. Haatan warshadaha waddanka ka jiraa waa warshadaha yaryar (light industries). Sidaas daraadeed, kaarboonka wasakheeya hawada ee ay sababaan warshadaha Soomaaliya aad ayuu u hooseeyaa (INC, 2018). Laakiin, maadaama uu dalku ku dadaalayo in uu gaadho horumar, waxaa dhismi doona warshado badan kuwaas oo sare u qaadi doona xadiga qiiqa. Sidaa darteed, waxaa wanaagsan in Siyaasaddu ay noqoto mid mustaqbalka eegta (forward-thinking) is la markaana uu dalku qaato jidka horumarka kaarboonka-yar (low carbon development path). Siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in kor loo qaado siddii loo yareyn lahaa qiiqa Gaasaska (GHG) ee warshadaha;
2) Waa in la hubiyaa siddii ay warshadaha mustaqbalka ee Soomaaliya u noqon la haayeen kuwo isticmaala teknoolojiyadda kaarboonka yar (aan kaarboon badan hawada ku sii dayn). Waa in warshadahaasi yihiin kuwo aan deegaanka waxyeelaynayn oo dhaqaale ahaan suurtogal ah in dalka laga aasaaso is la markaana la jaan qaadi kara tartanka adduunka ka jira;
3) Waan in la horumariyaa lana hirgeliyaa sahaminta wax soo saarka iyo teknoolojiyadda nadiifka ah (clean technologies);
4) Waa in la dhiirigeliyaa kala-duwanaanshaha (diversification) ilaha tamarta ee ay warshaduhu isticmaalaan iyo siddii ay u isticmaali la haayeen tamar nadiif ah;
5) Waa in kor loo qaadaa lana dhiirigeliyaa siddii ay warshadaha korantadu (laydhka) u isticmaali lahaayeen tamar kaarboonkeedu hooseeyo (tusaale. Tamarta dib loo cusboonaysiiyo);
6) Waa in la sameeyaa nidaam lagu horumariyo maalgashiga gaarka ah ee warshadaha cagaaran (green industry);

### 5.3.5. Qashinka

Kaarboonka hawada wasakheeya ee ka soo baxa waaxda qashinka waxa uu ka dhashaa ficilada ay bina- aadamku sameeyaan (anthropogenic activities) ee ay ka midka yihiin farsameynta

qashinka iyo qashin qubka. Qaaca ka soo baxa qashinka Soomaaliya waa: Methane, Carbon dioxide iyo Nitrous oxide. Qiiqa Methane-ka waxa uu ka yimaadaa maareynta qashinka adag iyo farsameynta qashinka dareeraha (waste water). Qiiqa Nitrous oxide (N2O) waxa uu ka yimaadaa howlaha la xiriira farsameynta qashinka dareeraha ah iyo bullaacadaha. Qiiqa Carbon-dioxide waaxda qashinku aad ayuu u yaryahay (1%), wuxuuna ka dhashaa gubidda qashinka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la hagaajiyaa maareynta qashinka iyo xakameynta wasakhda waxyeelada leh iyadoo la raacayo Mabda'a Bi'iye ayaa Bixinaya (Polluter Pays Principle);
2) Waa in kor loo qaado siddii loo yareyn lahaa qashinka is la markaana ahmiyad gaar ah la siiyo dib u adeegsiga iyo dib u warshadeynta qashinka ee waaxaha kala duwan;
3) Waa in la horumariyo siddii qashinka looga dhalin lahaa tamar la isticmaali karo;
4) Si loo xakameeyo wasakhda GHG, waa in la hagaajiyo maareynta xarumaha qashinka ee hada jira;
5) Waa in la dejiyo lana xoojiyo nidaamyada kormeerka si loo ogaado qaaca GHG ee waaxda qashinka ee hawada lagu sii daayo;
6) Si loo yareeyo qashinka Methane-ka ee ka soo baxa qashin-qubka waa in la dhimaa qashinka is la markaana dib loo warshadeeyaa (dib loo farsameeyaa) intii suurtagel ah;
7) Waa in kor loo qaadaa heerka fayadhowrka deegaanka iyadoo la xoojinayo hay'addaha iyo hirgelinta shuruucda nadaafadda iyo deegaanka;
8) Si loo soo jiito maalgashiga kaabayaasha waaxda qashinka, waa in la xoojiyaa iskaashiga dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay;
9) Waa in adeegyada maareynta qashinka iyo nidaamyada bullaacadaha la ballaariyaa iyadoo si siman/isku mid ah (equitable access) loo gaadh siinayo qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan dadka saboolka ah iyo kuwa nugul.

## 5.4.Arimaha Bulshada iyo Isbaddelka Cimilada

Awoodda bulsho ee la qabsiga iyo yareynta saameynta isbaddelka cimiladu waxa ay ku xidhan tahay muuqaalka guud ee dhaqaalaha bulshada, arrimaha jinsiga, caafimaadka iyo arrimo kale oo bulsho. Isbaddelka cimilada wuxuu sii kordhiyaa nuglaanta dadka saboolka ah ee dhanka helitaanka biyaha, nolol-maalmeedka iyo cudurada. Dadka la faquuqo (la takooro) sida haweenka saboolka ah, dadka da'da ah, kuwa naafada ah iyo caruurta ayaa halis ugu jira saameynta Isbaddelka cimilada sababtoo ah ma haystaan adeegyada aasaasiga ah oo ku filan. Xiriirka arrimaha bulshada iyo Isbaddelka cimiladu waxa ay salka ku haysaa awooda, dhaqaalaha iyo adeegyada qofku uu heli karo.

### 5.4.1. Caafimaadka

Caafimaadku waa tiirka horumarka Soomaaliya. Isbaddelka cimilada wuxuu yeelan doonaa saameyn caafimaad oo toos ah iyo mid dadban. Cudurrada shubanka sida daacuunka ayaa waxaa keena nadaafad xumo, laakiin xaaladda waxaa sii xumeyn kara Isbaddelka cimilada. Cudurka daacuunku waxa uu badanaa dilaacaa xilli roobaadka sida marka ay dhacaan fatahaaduhu. Daadadku waxay saameeyaan helitaanka biyo nadiif ah oo waxa ay wasakheeyaa

ama burburiyaan ceelashii biyaha laga cabayay. Sidoo kale cudurrada qaarkood waxa ay dilaacaa xilliyada jiilaalka ee ay biyuhu yar yihiin sababtoo ah dadku waxa ay biyaha la cabo ka soo dhaansadaan goobo (ilo) aan nadiif ahayn.

Saameynta caafimaad ee dadban waxaa ka mid ah: gaajada iyo nafaqo darrada ka dhalata abaaraha iyo cunto yaraanta ay sababto Isbaddelka cimiladu. Si loo badbaadiyo nolosha iyo caafimaadka dadka, waxaa loo baahan yahay in la dejiyo nidaam/istaraatajiyad hoos loogu dhigayo saameynta tooska ah iyo mida dadban ee Isbaddelka cimilada, is la markaana waan in la xoojiyo adkeysiga dadweynaha ee ku aadan isbadeladaasi dhacaya. Si arrimahaasi wax looga qabto, waxaa muhiim ah in la fahmo nuglaanta waaxda caafimaadka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) In la xoojiyo barnaamijyada lagu la soconayo caafimaadka dadweynaha iyadoo la tixgelinayo xiriirka ka dhexeeya Isbaddelka cimilada iyo cudurada ka dhasha isbadeladaasi;
2) In la fahmo saameynta Isbaddelka cimilada uu ku yeelan karo haweenka, carruurta, dhalinyarada iyo dadka naafada ah ee ku nool Soomaaliya loona abuuro jawi lagaga hortaggo waxyeelada Isbaddelka cimiladu uu u gaysan karo dadka nugul;
3) In kor loo qaado helida macluumaadka, is la markaana la sameeyo nidaamka digniinta hore ee ku saabsan abaaraha, fatahaadaha iyo cudurada faafa lana dejiyo sidii dadka loo gaadhsiin lahaa taakulada gurmadka;
4) In la sameeyo kooxaha caafimaadka bulshada (community health groups) is la markaa la kobciyo aqoonta ku aadan khataraha caafimaad iyo sidii wax looga qaban lahaa;
5) In la xoojiyo awoodda farsamo si loo maareeyo khataraha caafimaad ee la xiriira Isbaddelka cimilada;
6) In la horumariyo xog wadaagista is la markaana la sameeyo nidaamka maareynta macluumaadka caafimaadka ee cudurada oo ay ka mid yihiin cudurada cimiladu keento;
7) In la baadho dhacdooyinka cudurada (cudurada dilaaca) si loo aqoonsado/ogaaado dadka u nugul cudurada Isbaddelka cimilada ka dhasha;
8) In la xoojiyo adeega caafimaad ee hada jira si loo maareeyo cudurrada faafa ee la xiriira Isbaddelka cimilada;
9) In lagu daro khataraha caafimaad ee ka dhasha Isbaddelka cimilada dhamaan qorshayaasha iyo go'aan qaadashada heerarka kala duwan ee dowladda;
10) In aqoon dhaqameedka cimilada la xiriirta la aqoonsado laguna daro qorshayaasha wax lagaga qabanayo caafimaadka iyo cudurada ay sababto Isbaddelka cimiladu;
11) In la sameeyo qaab-dhismeed wax ku ool ah si loo maareeyo loona baahiyo macluumaadka ku saabsan halista caafimaad ee Isbaddelka cimilada;

### 5.4.2. Xuquuqul Insaanka

Siyaasadda Isbaddelka Cimiladu waxa ay aqoonsan tahay xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha. Waxa kale oo ay aqoonsan tahay saadaalinta ah in Isbaddelka cimiladu ay saameyn daran ku yeelan doonto dadka nugul oo ay ka mid yihiin: dadka saboolka ah ee ku nool guud ahaan dalka

(miyi iyo magaalo), haweenka, dadka laxaadka la', waayeelka, caruurta iyo dadka la takooro. Sidaa darteed, siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Hirgalinta howlaha wax ka qabashada Isbaddelka cimiladu waa in ay mar kasta tixgeliyaan ilaalinta xuquuqul insaanka. Waa in la dabaqo laguna dhaqmaa horumar ku saleysan ilaalinta xuquuqul insaanka, horumarkaas oo waafaqsan shuruucda waddanka iyo kuwa caalamiga ah ee ilaalinta xuquuqda aadanaha;
2) Waa in la hubiyaa in dadka nugul awooddooda la kobciyo iyo siddii ay u la qabsan lahaayeen saameynta Isbaddelka cimilada.

### 5.4.3. Jinsiga iyo Isbaddelka Cimilada

Sinnaanta jinsiga ayaa shardi u ah in guul laga gaadho wax ka qabashada Isbaddelka cimilada. Siyaasad qeexaysa sinnaanta jinsiga ee xagga helitaanka, adeegsiga iyo ka faa'idaysiga sayniska iyo teknoolajiyadda, waxbarashada iyo tababbarada ayaa sare u qaadaysa awoodda dalka ee yareynta masiibooyinka, hoos u dhigidda iyo la qabsiga Isbaddelka cimilada. Waxaa loo baahan yahay in la tixgeliyo xaaladaha bulsho, dhaqaale iyo arrimaha kale ee xiriirka la leh.

Iyadoo la raacayo siyaasadaha kala duwan ee qaran ee ku saabsan xuquuqda haweenka iyo ragga, waa in la ogaadaa saameynta kala duwan ay Isbaddelka cimiladu ku yeelan karto ragga iyo dumarka. Laakiin waa in si isku mid ah haweenka iyo raggu uga qayb qaataan tallaabooyinka wax laga qabanayo Isbaddelka cimilada. Sinnaanta jinsiga ayaa muhiim u ah dejinta, hirgelinta, kormeerka (kor joogteyn) iyo qiimeynta siyaasadda Isbaddelka cimilada. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in la tixgeliyo sinnaanta jinsiga marka la dejinayo siyaasadda Isbaddelka cimilada iyadoo la dhowrayo diinta, dhaqanka iyo xuquuqda aadanaha. Dumarku waa in ay qeyb ka noqdaan dhamaan heerarka kala duwan ee go'aan qaadashada ku aadan siyaasadda iyo barnaamijyada Isbaddelka cimilada.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la hubiyo siddii loogu dari lahaa mabaadi'ida sinnaanta jinsiga dhammaan siyaasadaha bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, nadaafadda iyo deegaanka;
2) Waa in la soo saaro macluumaad gaar ah oo ka turjumaya jinsiga si loo ogaado saameynta Isbaddelka cimilada ee ragga iyo dumarka;
3) Waa in la sameeyo yoolal waxtar u leh jinsiga iyo Isbaddelka cimilada iyadoo la qeexayo hab lagu qiisayo saameynta (indicators);
4) Waa in la la shaqeeyo ururada ka shaqeeya xuquuqda haweenka is la markaana laga qayb galiyo doodaha iyo arrimaha ku saabsan Isbaddelka cimilada;
5) Si uu jinsigu qayb uga noqdo siyaasadda Isbaddelka cimilada, qorsheynta, kor joogteynta iyo qiimeynta waa in la kobciyo awoodda hay'addaha ay khusayso ee ku hawlan Isbaddelka cimilada;

6) Waa in la ogaadaa lana lafa-guraa baahiyaha gaarka ah ee lab iyo dheddiga iyo saameynta la xiriirta Isbaddelka cimilada sida daadadka, abaaraha iyo cudurada;
7) Maaliyadda (dhaqaalaha) wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada waa in si wada jir ah loo qoondeeyaa iyadoo la tixgelinayo jinsiga. Taasi waxa ay u baahan doontaa in arrimaha jinsiga lagu daro dhamaan qorsheyaasha, hirgelinta iyo kormeerka ee maaliyadda cimilada (climate funds);
8) Waa in la xoojiyo adkeysiga dadka nugul, oo ay ku jiraan haweenka iyo caruurta, iyada oo la horumarinayo la qabsiga bulshada, helitaanka nolol-maalmeedka iyo adeegyada aasaasiga ah;
9) Waa in la dhiiri geliyaa ka qayb qaadashada ragga iyo haweenka ee siyaasadda Isbaddelka cimilada iyo go’aan qaadashada;

### 5.4.4. Shaqada iyo Isbaddelka Cimilada

Dadweynaha Soomaaliya waxay u badan yihiin dhalinyaro. In ka badan 80% waxaa lagu qiyaasay in ay da’doodu ka yar tahay 35 sano. Dhanka kale, dalka waxaa ka jirta shaqo la’aan baahsan. Qiyaastii 70% dhalinyarada waddanku waa bilaa shaqo (NDP, 9). Marka la eego saameynta Isbaddelka cimilada, xaaladda shaqo la’aanta ayaa sii xumaan karta. Isbaddelka Cimilada ayaa sidoo kale sababi kara iska horimaadyo (khilaaf) ku saleysan kheyraadka. Sidoo kale, waxaa jira xiriir ka dhexeeya korodhka kooxaha nabad diidka ah/Argagixisada (gaar ahaan Al-Shabaab) iyo abaaraha ba'an ee ka jira Soomaaliya. Kooxahaasi ayaa inta badan ku guuleysatay soo jiidashada dhalinyarada ay saameysay shaqo la’aanta (aan la hayn rajo shaqo), abaaraha iyo cunto yaraanta.

Dhanka kale, heerkulka sii kordhaya ee adduunka ee salka ku haya Isbaddelka cimilada ayaa keeni kara dhibaatooyin la xiriira dhanka shaqada. Heerkulka sare (kuleylka hawada) wuxuu khatar geliyaa bad qabka shaqaalaha wuxuuna yareeyaa wax soo saarkooda, gaar ahaan shaqaalaha beeraha, dhismaha iyo muruq-maalka/xoogsato (laborers). Saameynta ba’an ee heerkulku ku leeyahay wax soo saarka shaqaalaha ayaa ah mid la xaqiijiyay. Waxaa la saadaalinayaa in wadarta saacadaha shaqo ee Soomaaliya ay hoos u dhici doonto in ka badan 5% marka la gaaro sanadka 2030, taas oo u dhiganta in ka badan 172,000 oo shaqooyin waqti-buuxa ah (ILO, 2019).

Sidaa darteed, waxaa loo baahan yahay in la qaado tallaabooyin deg deg ah si loo yareeyo nuglaanta Soomaaliya ee cimilada iyo dhibaatooyinka dhaqaale ee ka dhalan kara. Tallaabooyinka/jawaabaha Isbaddelka cimilada ee ku aadan adkeysiga ayaa saameyn ku yeelan kara shaqooyinka dalka Soomaaliya. Tusaale ahaan, jawaabaha la-qabsashadu waxa ay abuuri karaan shaqooyin cusub oo ay buuxin karaan shaqaalaha waaxyaha ay saameeyeen halbeegyada yaraynta qaaca (mitigation measures). Siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in la sameeyo qiimeyn qaran oo ku aadan nuglaanta shaqooyinka. Qiimeyntu waxa ay muhiimad siin doontaa saameynta Isbaddelka cimilada iyo jawaabaha wax looga qabanayo si loo fahmo shaqooyinka baabi’i doona (la waayi doono), shaqooyinka cusub

ee la abuuri doono, waaxyaha iyo siddii wax looga qaban lahaa arrimaha shaqo abuurka si loo yareeyo saameynta Isbaddelka cimilada ee la xiriira shaqooyinka;

2) Tallaabooyinka la-qabsiga iyo yareyntu waa in ay fiiro gaar ah siiyaan shaqooyinka. Si kor loogu qaado looguna gudbo dhaqaalaha cagaaran, waa in si taxadar leh loo qaadaa tallaabooyinka wax looga qabanayo Isbaddelka cimilada is la markaana lagu dadaalaa siddii loo yareyn lahaa in shaqooyin badan la waayo;
3) Waa in la dhiso shaqaale xirfado leh is la markaana la horumariyo lana maalgeliyo barnaamijyada horumarinta xirfadaha;
4) Waa in la dhiiri geliyo shaqo abuurka waaxaha kala duwan iyo siddii ay dhalinyaradu u heli lahaayeen shaqooyinkaasi;
5) Si loo yareeyo nuglaanta, waa in la sameeyaa nidaamka ilaalinta iyo daryeelka bulshada lana kobciyaa/dhisaa awoodda hay'addaha u xil saaran fulinta barnaamijyadaas;
6) Iyadoo la raacayo Siyaasadda Qaran ee Shaqada iyo shuruucda shaqada iyo shaqaalalaha, waa in ay shaqaaluhu yeeshaan (ku jiraan) qorshaha caymiska shaqada (employment insurance scheme);
7) Waa in la bilaabaa lana balaariyaa barnaamijyada shaqo abuurista iyo cirib tirka saboolnimada (tusaale. Barnaamijyada Iskaa Wax u Qabso, Shaqo Qaran iwm).

### 5.4.5. Haajiridda iyo Isbaddelka Cimilada

Haajirida (qofka oo ka taga deegaankiisa) waxaa sababa arrimo: dhaqaale, bulsho, nabad galyo darro iyo caqabadaha deegaanka. Isbaddelka cimilada ayaa la filayaa in ay kordhin doonto tirada dadka deegaankooda ka tagaya gaar ahaan dadka miyiga ka imanaya ee magaalooyinka u soo guuraya.

Sida ay qortay hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxootiga ee UNHCR, sanadkii 2019 baracayaasha dalka gudahiisa waxa tiradooda lagu qiiyaasay 2.6 milyan. In kastoo amni darradu ay tahay sababta ugu weyn ee barakaca, Isbaddelka cimilada ayaa qayb ka ah barakaca dadka maadaama dalka ay soo food saartay abaaro soo noq noqday iyo daadad kuwaas oo baabi'iyay dhul-beereed iyo nolol-maalmeedkii kumanaan qof.

Dadka barakacayaasha badankood waxa ay iskood u degaan goobaha barakacayaasha (IDP camps) kuwaas oo ku yaal gudaha iyo koonayaasha magaalooyinka dalka. Dadkaasi waxa ay ku nool yihiin xaalado adag.

Barakacayaashan ayaa culeys saaraya kheyraadka yar, adeegyada aasaasiga ah iyo fursadaha aan badneyn ee magaalooyinka. Taasi waxa ay horseedi kartaa in tahriibka dhalinyarada magaalooyinku uu korodho.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Waa in tababaro xirfadeed la siiyaa gaar ahaan dhalinyarada ku nool xaafadaha ay ku badan yihiin dadka barakacayaashu;
2) Si loo yareeyo dadka magaalooyinka soo galaya, waa in maalgelin lagu sameeyaa beeralayda iyo xoolo dhaqatada is la markaana la xoojiyaa siddii loo beeri lahaa dalag u adkaysan kara abaarta iyo cayayaanka, lana horumariyaa waraabka;

3) Waa in la horumariyaa isku socodka miyiga iyo magaalooyinka sida waddooyinka;
4) Waa in la dhiirigeliyaa lana sameeyaa barnaamijyo kor loogu qaadayo xirfadaha dadka reer miyiga. Taasi waxa ay fududeyn siddii dadku u heli lahaayeen nolol-maalmeed dheeri ah (alternative livelihood);
5) Waa in haajiridda (migration) lagu daraa Siyaasaddaha Horumarineed ee dalka.

# CUTUBKA 6aad

# MAAMULKA SIYAASADDA ISBADDELKA CIMILADA

## 6.1.Qaab-dhismeedka Hay'addaha

Saameynta isbaddelka cimiladu waxa ay gaarsiisan tahay heer caalami, gobol, qaran, iyo maamul hoose. Sidaas darteed, maamulka arrimaha la xiriira isbaddelka cimiladu waa in uu tixgeliyaa heerarka maamul ee dalka ka jira.  Waxaa jira hay'ado kala duwan oo waajibaadkoodu yahay in ay wax ka qabtaan arrimaha isbaddelka cimilada. Kuwaas waxaa ka mid ah hay'adaha dowladda, ganacsatada, ururada aan dowliga ahayn iyo hay'adaha caalamiga ah.

### 6.1.1. Hay'addaha Dowladda & Guddiyadda

Si wax looga qabto saameynta isbaddelka cimilada, waxaa muhiim ah in la helo qaab-dhismeed hay'adeed oo ka shaqeeya isku duwidda, xidhiidhinta iyo hirgelinta dadaallada wax looga qabanayo isbaddelka cimilada. Qaab dhismeed hay'adeed oo wax ku ool ah waxa uu suurta gelinayaa in la helo taageero siyaasadeed iyo mid farsamo ama aqoonneed kuwaas oo lagu la tacaalayo khataraha la xiriira isbaddelka cimilada. Sidaa darteed, siyaasaddani waxa ay qeexaysaa hay'addaha ku habboon is la markaana waxa ay abuuraysaa guddiyo heer qaran iyo heer maamul goboleed oo ka shaqeeya arrimaha la xiriira isbaddelka cimilada.

Sidaas daraadeed, wasaaraddaha qaran ee soo socda iyo waaxyahooda waxaa loo aqoonsaday in ay kaalin muhiim ah ka qaadanayaan hirgelinta siyaasaddan;


1. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada

**<u>Wasaaradaha Waaxyaha ee heer Qaran</u>**

2. Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha;
3. Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka
4. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga;
5. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;
6. Wasaaradda Kheyraadka Dabiiciga ah iyo Batroolka;
7. Wasaaradda Hawlaha Guud, Guryeynta iyo Dib-u-dhiska
8. Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda
9. Wasaaradda Gaadiidka & Duulimaadka Rayidka
10. Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
11. Wasaaradda Caafimaadka
12. Wasaaradda Waxbarashada
13. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha

14. Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka

15. Hay’ada Qaran ee Maareynta Masiibooyinka




Qaab-dhismeedka Maamulka Isbadelka Cimilada

Fiiro gaar ah. Xariijinka/falaadhu waxa ay tilmaamayaa war-bixin iyo xog-wadaag (reporting/info sharing)

**<u>Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada</u>**

Wasaaraddu waa hay'ada qaranka (National Designated Authority – NDA) ee loo asteeyey dhamaan arrimaha la xiriira maareynta deeganka & isbeddelka cimilada. Waajibaadka Wasaaraddu waa ilaalinta deegaanka, kheyraadkiisa dabiiciga ah iyo maareynta isbaddelka cimilada. Isagoo gudanaya waajibaadkaas iyo hirgelinta Siyaasaddan, Wasaaraddu waxa ay

wada shaqayn la yeelanaysaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha kala duwan ee ku howlan arrimaha isbaddelka cimilada.

Wasaaraddu waxa ay gudoomin doonaysaa Guddiga Qaran ee Isbaddelka Cimilada iyo Guddiga Waaxyaha ee Isbaddelka Cimilada. Wasaaraddu waxa ay warbixin siinaysaa Golaha Wasiirada, kaas oo isna u gudbiya warbixin sanadle ah baarlamaanka (Golaha Shacabka).

Waajibaadka Wasaaradda waxaa ka mid ah:

- Hogaaminta iyo xoojinta maamulka isbaddelka cimilada Soomaaliya;
- La shaqeynta iyo iskaashiga daneeyayaasha kale si loo hubiyo gaaritaanka ujeeddooyinka Siyaasadan;
- Ka qeyb gelidda heshiisyadda iyo shirarka caalamiga ah ee Isbaddelka cimilada & deegaanka;
- Sameynta Guddiga Farsamo ee La socodka & Qiimeynta dhaqangelinta Siyaasadan;
- Sameynta nidaam kormeer oo loogu talo galay ururinta xogta iyo macluumaadka iyo ka warbixinta horumarka laga gaaro hirgelinta siyaasadan;
- Diyaarinta warbixinno xilliyeed la xiriira xaaladda Isbaddelka cimilada ee dalka;
- Diyaarinta iyo gudbinta warbixinnada loo dirayo UNFCCC;
- Dhiirigelinta barnaamijyo waxbarasho oo toos ah iyo kuwo dadban iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Waxbarashada;
- Talo siinta iyo taageeridda dowladaha xubinta ka ah Federaalka ee dhanka arrimaha ku saabsan Isbaddelka cimilada;
- Taageeridda iyo tallo siinta Wasaaradaha Waaxyaha siddii ay u gudan lahaayeen waajibaadkooda ay qeexayso Siyaasaddani ama siyaasaddaha kale ee deegaanka.

**Guddiga Qaran ee Isbaddelka Cimilada**

Guddiga Qaran ee Isbaddelka Cimiladu waxaa uu u xil saaran yahay la socodka iyo kormeerka hirgelinta siyaasadda Isbaddelka cimilada. Guddiga waxaa qayb ka noqonaya dan-wadaagayaal kala duwan (multi-stakeholder), waxaana uu mas'uul ka yahay isuduwida sare ee siyaasadda (high level policy coordination) iyo guud ahaan howlaha Isbaddelka cimilada ee Soomaaliya. Xubnaha Guddigu waa: Wasiirka Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada, JFS (ama cida uu/ay u igmado/igamato), Wasiirada Wasaaradaha Waaxyaha (kor ku xusan), Agaasimayaasha Hay'addaha Dowladda, Wasiirada Deegaanka ee Maamul Gobolleedyada, Ganacsatada iy Ururada aan dowliga ahayn (bulshada rayidka).

Waajibaadka Guddigu waa:

- Kormeer iyo isuduwidda guud ee heer siyaasadeed (at policy level), si loo dardar geliyo hirgelinta Siyaasadda.
- Hubinta sidii loo heli lahaa taageerada dowladda ee ku aaddan hirgelinta Siyaasadda Isbaddelka cimilada.

- Qaadidda tallaabooyinka ku habboon ee lagu xaqiijin karo ujeeddooyinka hiigsiga iyo yoolka Siyaasadda.
- Ka warbixinta horumarka laga sameeyay ee ku aadan fulinta Siyaasadda Isbaddelka cimilada.

**Guddiga Waaxyaha ee Isbaddelka Cimilada**

Wasaaradaha waaxyuhu waxay mas'uul ka yihiin fulinta qaybaha Siyaasaddan ee waaxyaha gaarka u taabanaya. Guddigu waxa uu ka kooban yahay dhammaan Waasaradaha Waaxyaha (ee kor ku xusan) kuwaas oo door muhiim ah ku leh hirgelinta Siyaasadda. Guddigu waxa uu isu keeni doonaa mas'uuliyiinta qaybaha dowladda ee ku howlan arrimaha isbaddelka cimilada. Ujeeddada guddigu waa is-weydaarsiga macluumaadka, wada-tashi, heshiis iyo taageerada qaybaha dowladda ee ku saabsan wax ka qabashada saameynta Isbaddelka cimilada. Guddiga waxaa gudoomin doona Wasaaradda Deegaanka & Isbaddelka Cimilada.

Doorarka/Masuuliyadda Guddigu waa:

- In uu noqdo gole la isku weydaarsado fikradaha iyadoo la wadaagayo howlaha socda iyo qorshayaasaha wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada.
- Isu-duwidda iyo ka-talo bixinta waaxyaha gaarka ah iyo hirgelinta barnaamijyada waaxyaha. Koormeerka iyo qiimeynta natiijooyinka howlaha la qabtay iyo sidoo kale ka talo-bixinta jihada mustaqbalka ee Siyaasadda.
- Wax ka qabashada mawduucyada muhiimka ah (cross-cutting themes) ee Siyaasadda iyo dhinacyada arimaha bulshada ee Isbaddelka cimilada.

**Guddiyada Dowlad Gobolleedyada (heer Maamul Gobolleed iyo Dowlad Hoose)**

Dowladdaha xubinta ka ah Federaalka waxa ay Siyaasaddan ka hirgelinayaan gobolladooda. Maamul Goboleedyadu waxa ay leeyihiin Wasaarado Deegaan kuwaas oo mas'uul ka ah maareynta deegaanka, oo ay ku jirto Isbaddelka Cimilada. Maamul Goboleed kasta waxa uu aasaasi doonaa laba guddi oo kale ah: Gudigga heer Maamul Goboleed iyo Guddiyada Dowladaha Hoose ee Isbaddelka cimilada.

Doorka guddiga heer maamul goboleed waa isuduwidda howlaha ka jawaab celinta Isbaddelka cimilada ee dowlad gobolleedka, halka guddiyada dowladaha hoose ay fulinayaa hawlaha wax looga qabanayo Isbaddelka cimilada ee degmooyinka, magaalooyinka iyo tuullooyinka.

**Xarunta Cilmi-baarista (Daraasaadka) Isbaddelka Cimilda**

Waxaa jira daneeyayaal (stakeholders) badan oo aan fahansanayn arrimaha ku saabsan Isbaddelka cimilada iyo saameynteeda. Sidoo kale, bulsho weyntu fahan badan kama haysato arimahaas. Waxaa loo baahan yahay in daraasadda Isbaddelka cimilada si habboon loo agaasimo si ay u noqdaan kuwo waxtar leh oo daboola baahiyaha daneeyayaasha sida siyaasad-dejiyeyaasha (policy makers) iyo fuliyayaasha (implementors). Wadaagista macluumaadka iyo cilmi baarista waa arrimo muhiim ah oo ay tahay in la tixgelinayo. Natiijooyinka ka soo baxa cilmi baarista ayaa noqonaya gundigga hormarinta iyo hirgelinta barnaamijyada iyo

qorshayaasha waxqabadka ee la-qabsashada iyo yareynta saameynta Isbaddelka cimilada. Sidaas darteed, barnaamijyada iyo qorshayaashu waa in ay ahaadaan kuwo ku saleysan caddeymo (evidence-based). Xarunta Cilmi-baarista Isbaddelka Cimilada waxa ay gacan ka geysan doontaa kor u qaadidda aqoonta iyo cilmiga ku saabsan arrimaha Isbaddelka cimilada. Sidoo kale, xaruntu waxa ay door muhiim ah ka ciyaari doontaa siddii loo gaari lahaa mawduucyada ku xusan Cutubka 4aad, gaar ahaan Qeybta Cilmi baarista.

Doorarka Xaruntu waxa ay noqonayaan:

- Fududeynta guud ahaan cilmi baarista ku saabsan Isbaddelka cimilada;
- Isu-duwidda cilmi baaris isku dhafan (interdisciplinary research) oo ku saabsan Isbaddelka cimilada, yareynta/hoos u dhigidda (mitigation), la-qabsashada (adaptation), nuglaanta (vulnerability) iyo saadaasha (projections);
- Faafinta natiijooyinka cilmi baarista ee ku saabsan arrimaha Isbaddelka cimilada;
- Siinta/Bixinta taageero farsamo, hagitaan iyo tilmaamo la siinayo hay'addaha ku hawlan arrimaha Isbaddelka cimilada sida Wasaaradda Deegaanka & Isbaddelka Cimilada iyo Wasaaradaha Waaxyaha.

### 6.1.2. Ururada Rayidka (Ururada aan Dowliga ahayn)

Waa muhiim in bulshadu ay qayb ka tahay go'aan qaadashada arrimaha la xiriira isbaddelka cimilada. Waa inay ku lug yeeshaan kor joogteynta iyo qiimeynta tallaabooyinka wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada. Taasi waxa ay xoojin la-qabsiga Isbaddelka cimilada. Arimaha Isbaddelka cimiladu waxa ay abuurayaan jawi wada shaqeyn oo dhex mara dowladda, ururada maxaliga ah, hayadaha UN-ka, kuwa horumarinta, ururada rayidka ah iyo bulsho weynta.

Wakhti xaadirkan, hay'ado badan oo aan dowli aheyn / ururada rayidka ah (NGO-yada / CSOs) ayaa si toos ah iyo si dadban ugu hawlan ilaalinta deegaanka iyo arrimaha la xiriira Isbaddelka cimilada ee Soomaaliya. NGO-yada / CSOs waxay fuliyaan dadaallo gaar ah oo ku saabsan Isbaddelka cimilada. Sidoo kale waxa ay ku lug leeyihiin siyaasaddaha, qorshayaasha iyo doodaha ku saabsan Isbaddelka cimilada ee heer qaran iyo heer caalami.

Doorarka kale ee NGOs/CSOs ee la xiriira Isbaddelka cimilada waxaa ka mid ah: waxbarashada bulshada, cilmi baarista iyo falanqaynta/lafa-gurista halista cimilada, barnaamijka gurmadka masiibooyinka, gargaarka, xoojinta la qabsiga bulshada ee ku-aadan Isbaddelka cimilada, kor u qaadista la-tashiga bulshada iyo ka qeyb galka, fududeynta abaabulka CSO/NGOs, isuduwidda iyo wada shaqeynta dowladda ee ku saabsan Isbaddelka cimilada, kormeerka/kor joogteynta hirgelinta siyaasadda, iyo la xisaabtanka tallaabooyinka ku wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada.

Hadaba iyadoo la aqoonsan yahay doorka muhiimka ah ee ururada aan dowliga ahayn ay ka cayaaraan ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah iyo maamulka deegaanka ee Soomaaliya, dowladdu waxa ay taageeraysaa siddii kor loogu qaadi lahaa doorkooda iyo ka qeybgalka ururada aan

dowliga ahayn. Hawlaha ururada aan dowliga ahayn ee ku saabsan Isbaddelka cimilada waxa ay qayb ka noqonayaan tallaabooyinka qaran ee ku aadan Isbaddelka cimilada. Dowladdu waxa kale oo ay taageeraysaa in la kobciyo awoodda bulshada rayidka ah si ay uga qayb qaataan ururinta iyo wadaagga macluumaadka, dejinta, hirgelinta iyo kormeerka siyaasadda iyo barnaamijyadda ku saabsan Isbaddelka cimilada.

#### 6.1.3. Shirkadaha Gaarka ah

In kasta oo ay sannado badan colaado socdeen, hadana ganacsiga gaarka ee Soomaaliya horumar ayuu sameeyay. Ganacsatadu waa in laga qayb galiyaa hawlaha ku saabsan Isbaddelka cimilada iyo fulinta siyaasadda. Ganacsatada Soomaaliya waxa ay u baahan yihiin inay fahmaan saameynta Isbaddelka cimilada ay ku yeelan karto faa'iidada (profit) ganacsiga. Tusaale ahaan, sida hoos u dhigidda isticmaalka tamartu (energy efficiency) ay u yareyn karto kharashaadka ganacsiga. Sidoo kale waan in ganacsatadu ay fahmaan sida ay u shaqeeyaan suuqyada kaarboon (carbon markets). Intaas waxa dheer, baahida loo qabo in la xoojiyo maalgashiga ganacsiga gaarka ee ku aadaan kaabayaasha dhaqaale ee la jaan qaadaya Isbaddelka cimilada sida: isticmaalka koronto aan kaarboon badan hawada ku sii daynayn, adeegsiga tamarta la cusbooneysiiyo. Tallaabooyinkaasi waxa ay kor u qaadayaa helitaanka tamarta nadiif ah oo tayo leh.

### 6.2.Qaabdhismeedka Sharciga

Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020 -2024, Hiigsiga 2030 iyo dastuurka Soomaaliya ayaa dhigaaya in deegaanku uu yahay saldhigga horumarka dalka iyo nolosha bulshada. Siyaasaddani waxa ay ka duulaysaa NPD-9, hiigsiga 2030, Siyaasadda Maareynta Deegaanka iyo qodobada 25 & 45aad ee Dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya.

#### 6.2.1. Xidhiidhka Siyaasadda Isbaddelka Cimilada iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020 to 2024

Dowladda Soomaaliya waxa ay feejignaan gaar ah siinaysaa arrimaha la xiriira Isbaddelka cimilada. Isbaddelka cimiladu waxa uu si toos ah ama si dadban u taabanayaa waax kasta. Sidaa daraadeed, wax ka qabashada Isbaddelka cimilada ayaa qayb ka ah Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2020 - 2024. Qaybta/Tiirka 3aad ee Qorshaha Horumarinta Qaranku waxa uu la xiriiraa Horumarinta Dhaqaalaha.

> *Ujeeddada tiirka 3-aad ayaa ah in wax ka badel lagu sameeyo dhaqaalaha iyadoo la xoojinayo adkeysiga wax soo saarka xoolaha iyo dalagga si ay ula jaan qaadaan caqabadaha sii kordhaya ee dhasha Isbaddelka cimilada. Dowladda Soomaaliya waxa ay aqoonsan tahay in ku tiirsanaanta xoolaha iyo beeruhu ay keenayaan khatar dhaqaale iyo mid bulsho oo aad u weyn sababta oo ah waxa ay u nugul yihiin Isbaddelka cimilada. Sida ku xusan warbixinta Qiimaynta Saameynta Abaarta iyo Baahiyaha Soomaaliya (DINA), khasaaraha dhaqaale ee ka dhashay abaartii sanadkii 2016/17 waxaa lagu qiyaasay US $ 3.25 billion (NDP-9).*

Wax ka qabashada Isbaddelka cimilada waxa ay ka mid tahay mowduucyada muhiimka ah ee ay taageerada ku bixiyaan saaxiibayaasha horumarineed (development partners) ee Soomaaliya.

### 6.2.2. Siyaasaddaha iyo Sharciyada kala duwan ee taabanaya Deegaanka & Isbaddelka Cimilada

Siyaasaddan waxaa la diyaariyay iyadoo la tixgelinayo siyaasadaha waaxyaha (sectoral policies and strategies).

### 6.2.3. Heshiisyada Caalamiga ah

Soomaaliya waxay qayb ka ahayd UNFCCC tan iyo Bishii Disembar 2009 kii, iyadoo ah xubin Lifaaqa I. Soomaaliya ayaa sidoo kale ansixisay heshiiska Kyoto Luuliyo 2010kii. Hawlgalkii ugu horeeyay waxaa uu ahaa diyaarinta Barnaamijka Qaran ee La-qabsiga Isbaddelka ee NAPA oo ay taageero ka gaysteen, Hay'adda Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP) iyo Global Environment Facility (GEF). Hadafkii ugu weynaa ee NAPA wuxuu ahaa in Soomaaliya ay noqoto dal u adkaysan kara Isbaddelka cimilada. Bishii Juun 2013 ayaa NAPA waxaa loo gudbiyay UNFCCC.

Ansixintii heshiiskii (Paris) ee Isbaddelka cimilada, iyo cahdigii Qaramada Midoobay ee Isbaddelka Cimilada (UNFCCC) Iyo heshiiska Kyoto, waxa uu muujisay sida ay Soomaaliya uga go'an tahay xilna uga saaran yahay sidii loo hirgalin lahaa qorshayaasha lagu yaraynaayo saameynta ay leedahay Isbaddelka cimiladu iyo sida loola qabsan lahaa saameynta ay ka tagto isbaddelka cimiladu. Dejinta siyaasadda qaran ee Isbaddelka cimilida waxay u saamixi doontaa Soomaaliya in ay fuliso waajibaadkeeda cahdigi Qaramada Midoobey ee Isbaddelka Cimilada (UNFCCC), si ay u qaadato door muhiim ah oo ku aadan la-tacaalidda isbaddelka cimilada. Himilada iyo qorshayaasha fog ee Soomaaliya waxa ay aqoonsan yihiim muhiimada ay leedahay Isbaddelka cimilada iyo saameynteeda dhanka horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada. Dowlada Soomaaliya waxay muhimad siinaysaa dadaalada ku wajahan in la yareeyo saameynta isbedalada cimilada.

Liistada soo socota waa heshiisyada ay Soomaaliya saxiixday ama ay ansixisay. Si loo dhaqan geliyo heshiisyada, dalku waxa uu dejiyaa/soo saaraa siyaasaddo iyo shuruuc ku saleysan heshiisyada.


1. Heshiiska Caalamiga ah ee mamnuucaya ka ganacsiga noocyada noolaha dhirta iyo duurjoogta dabargoa ku dhaw (halis ku sugan in ay dabar go'aan) (CITES);
2. Heeshiiska ilaalinta xayawaanka (duurjoogta) xuduudaha iskaga goosha;
3. Heshiis Goboleedka Ilaalinta Badda Cas iyo Deegaanka Gacanka Cadmeed;
4. Heshiis Goboleedka iyo Iskaashiga lagula tacaalayo ama looga hortagayo wasakhaynta ay sababaan shidaalka (batroolka) iyo walxaha halista ah;
5. Heshiiska Qaramada Midoobay Sharciga Badda;

6. Heshiiska Qaramada Midoobay ee lagula dagaallamayo nabaad-guurka (Xaalufka) (UNCCD);
7. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Isbaddelka Cimilada (UNFCCC);
8. Heshiiska Kyota;
9. Heshiiska Noolaha kala duwan;
10. Heshiiska sugnaanta (ilaalinta) noolaha (Protocol on Bio-Security) (Protocol-ka Cartagena);
11. Heshiisyada Basel, Stockholm iyo Rotterdam;
12. Heshiiska Bariga Afrika Seerayaasha, ilaalinta dhirta (flora) iyo xayawaanka (fauna);
13. Heshiiska Bariga Afrika ee ka hortagga wasakhda badda ee xaaladaha degdegga ah;
14. Heshiiska Ilaalinta, Maareynta iyo Horumarinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha Bariga Afrika (Heshiiska Nairobi).
15. Heshiiska ku saabsan Waxyaabaha daciifiya lakabka Ozone ka (Montreal Protocol)
16. Heshiiska ku saabsan ilaalinta lakabka Ozone ka (Heshiiska Vienna);

## CUTUBAKA 7aad
## DHAQAALAHA/MAALIYADDA ISBADDELKA CIMILADA

Si wax looga qabto Isbaddelka cimilada, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay taageero maaliyadeed oo laga helo ilaha gudaha (domestic sources) iyo Beesha Caalamka. Ilaha gudaha waxaa laga heli karaa miisaaniyada dowladda iyo tabarucaad laga helo shirkadaha, ururada iyo shaqsiyaad. Taageerada caalamiga ahi waxa noqon kartaa laba geesood (bilateral) iyo mid laga helo sanduuqyada caalamiga ah ee cimilada (International Climate Funds). Sandquuyadaas waxaa ka mid ah: Sanduuqa Gaarka ah ee Isbaddelka Cimilada (Special Climate Change Fund), Sanduuqa Cimilada Cagaaran (Green Climate Fund), Sanduuqa la-qabsiga (Adaptation Fund), Xarunta Deegaanka ee Adduunka (Global Environment Facility), iyo Sanduuqa Taageeridda Waddamada Horumarkoodu hooseeyo (Least Developed Country Fund).

Taageerada laba geesoodka ah waxaa laga heli karaa waddamada deeqaha bixiya. Badanaa waddamadaasi waxa ay deeqaha soo mariyaan hay'ado gaar ah sida UNDP, UNEP, UNIDO, iwm.




Ilaha dhaqaale ee dhaqangelinta Siyaasadda Isbadelka Cimilada

Sidaa darteed, maalgelinta ama ilaha dhaqaalaha ee hirgelinta Siyaasadda Isbaddelka Cimiladu waxa ay ka iman doonaan ilaha gudaha iyo taageerada caalamka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) Sahaminta ilaha dhaqaale ee la heli karo, is la markaana waa in dhaqaalahaas si wax ku ool ah loogu adeegsadaa dadaallada wax lagaga qabanayo Isbaddelka cimilada: la-qabsiga (adaptation) iyo hoos u dhigidda (mitigation);
2) Hagaajinta awoodda abaabulidda kheyraadka si loo soo jiito maalgelin iyo maaliyad ku filan oo laga helo gudaha iyo dibadda si wax looga qabto isbadelada cimilada;
3) Samaynta iyo xoojinta xiriirka dowladda iyo ganacsiga gaarka ah si loo dhiirigeliyo ka qayb qaadashada daneeyayaasha iyadoo la dhiirigalinayo is la markaana la abuurayo jawi maalgashi iyo siddii loo hirgelin lahaa tallaabooyinka lagu yareynayo kaarboonka;
4) Xoojinta hay'addaha ku howlan hirgelinta Siyaasaddan si ay uga faa'iideystaan ilaha dhaqaale ee cimilada gudaha iyo dibedda;
5) In la raadiyo taageerayaal badan oo isku-dhafan iyo kuwa-labo geesood ah si loo helo taageero farsamo iyadoo la kobcinayo awoodda korna loo qaadayo wacyiga dhinaca Isbaddelka cimilada;
6) In la dhiso nidaam farsamo oo wax ku ool ah iyo in la kobciyo istaraatijiyadda maaliyadeed ee lagu taageerayo hirgelinta cimilada, awoodda la qabsashada iyo tallaabooyinka mudnaanta koowaad ee kobaca.
7) In la sameeyo nidaamyada suuqa ku salaysan ee cimilada, sida Nidaamyada Horumarinta Nadiifinta, nidaamka wadaagidda faa'iidada ee REDD + ku jira, ganacsiga/iibsiga kaarboonka, iyo nidaamka canshuuraha iyo cashuur dhaafka;
8) Dhiirigelinta maalgalinta ganacsiga gaarka loo leeyahay, gaar ahaan dhinaca tamarta, maareynta qashinka, daaqa iyo xoolaha, iyo beeraha, horumarinta warshadaha iyo sancada teknoolajiyada.
9) Hirgelinta hufnaan dhanka dhaqaaalaha ah, ka hortagga musuqmaasuqa, hab-dhaqanka iyo isla xisaabtan si loo ilaaliyo maaliyadda/dhaqaalah cimilada loogu talo galay;
10) Sameynta habraac ku saabsan isu-duwidda, raadinta iyo kormeerka ilaha dhaqaale, saameyntooda iyo isticmaalkooda.

## CUTUBKA 8[aad]
## DABAGALKA IYO QIIMEYNTA SIYAASADDA

Iyadoo la eegayo aqoonta saynis iyo farsamooyinka cusub ee soo kordha, Siyaasaddan waxaa lagu sameyn karaa kabis iyo wax ka badelis.  Sidoo kale, waxa muhiim ah in Siyaasaddani la jaan qaado heshiisyada caalamiga ah. Korjoogteynta (dabagalka iyo qiimeynta) waxa ay muhiim u tahay sidii loo hubin lahaa wax ku oolnimada tallaabooyinka la qaaday iyo isla xisaabtan ku aadan in la gaadhay ujeedooyinka Siyaasadda.

Korjoogteyn iyo qiimeyn ayaa loo baahan yahay in la sameeyo iyadoo la diyaarinayo warbixinno xilliyeed (saddex-biloodle, lix bilood iyo sanadle). Warbixinadaa waxaa diyaarinaya Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada, JFS. Nidaamka warbixintu waxa ay raacaysaa/maraysaa qaab-dhismeedka maamulka cimilada ee lagu qeexay cutubka 6[aad] (Qeybta 6.1.1.). Sidoo kale, Wasaaradda waaxuhu waxa ay sameyn karaan nidaam kormeer iyo qiimeyn lagula soconayo barnaamijyada Isbaddelka cimilada ee ay fuliyaan. Wasaaradda Deegaanka & Isbaddelka Cimiladu waxa ay yagleeli kartaa Guddi Korjoogteyn Farsamo & Qiimeyn (Technical Monitoring & Evaluation Committee) si uu ula socdo dhaqangelinta siyaasada. Guddigaasi waxa ay sameyn doonaan qaab-dhismeedka korjoogteynta iyo qiimeynta oo dhameystiran kaas oo xooga saari doona korjoogteyn joogto ah iyo qiimeyn xilliyeed si loo hubiyo natiijooyinka tallaabooyinka la qaaday iyo saameyntooda. Siyaasadda Isbaddelka Cimilada ee Soomaaliya waxaa dib u eegis lagu sameynayaa 5tii (shantii) sanaba mar, haddii aysan jirin wax degdeg ah oo u baahan in dib u eegis lagu sameeyo.

**Bayaanada Siyaasadeed**

1) In la aasaaso lana xoojiyo nidaam kormeer oo lagula soconayo Isbaddelka cimilada iyo jawiga dalka oo dhan sida: roobka, heerkulka, dhacdooyinka cimilada ee ba'an iyo saameyntooda, heerarka badda iyo heerkulka oogada badda;
2) In la sameeyo nidaam kormeer oo loogu talo galay ururinta macluumaadka iyo warbixinta la xiriira hirgelinta tallaabooyinka la-qabsashada (adaptation interventions);
3) Wasaaradaha ka shaqeeya wax ka qabashada isbaddelka cimilada waa in ay sameeyaan qiimeyn joogto ah (saddex-biloodle iyo sanadle) si ay ula socodaan hirgelinta siyaasada sida ay u fulinayaan waaxaha ay khuseyso;
4) Si loo ogaado tallaabooyinka la qaadayo ay gacan ka gaysanayaa gaaritaanka ujeedooyinka Siyaasaddan, waa in la sameeyaa qiimey ku aadan saameynta hirgelinta Siyaasaddan. Qiimeyntaa waxaa la sameyn muddada gaaban, muddada dhexe iyo muddada fog;
5) Warbixinada qaran ee loo gudbinayo UNFCCC waa in ay ku jiraan xogtii iyo macluumaadkii ugu dambeeyay ee la soo ururiyay. Warbixinadaas qaran waa in loo diyaariyaa si waafaqsan nidaamka/shuruudaha warbixinada caalamiga ah ee lagu heshiiyay;
6) Waa in dadweynaha iyo daneeyayaasha kale lala wadaago wakhtiga ku habboon warbixinnada qiimeynta si ay uga dhiibtaan fikirkooda iyo golayaasha kala duwan ee

dowladda si ay qayb uga noqdaan go’aan qaadashada iyo wax ka qabashada isbaddelka cimilada.